




Dhulkii Sunta

“ Halista la mooganyahay: Sunta ku aasan badda iyo berriga Soomaaliya ”

W/Q: Cabdifataax Xasan Maxamed “Barawaani”

W/Q: Cabdifataax Xasan Maxamed “Barawaani”

Email: abdifatahbarawani@gmail.com

Website: abdifatahbarawani.wordpress.com

Goobta: Hargeysa, Waqooyi Galbeed, Soomaaliya

Xilliga la diyaarinayey: Luulyo 2018 — Janaayo 2019

Xilliga la faafinayey: 20 - Feb – 2019 ilaa 25 - Maarso - 2019

Tusmada Daraasadda

Qeybta 1aad: Billowgii Aafada Badda iyo Berriga Soomaaliya

- Qeybtan waxa ay ka koobantahay afar maqaal, kuwaas ka hadlaya goorta ay soo bilaabmatey aafada sun ku shubidda ee badda iyo berriga Soomaaliya. Waxaan qeybtan lagu lafo gurayaa aasaaskii hore ee sunta, jaadadkeeda, gacmihii bilaabayey, goobihii iyo fuliyayaashii oo si guud mar ah aynu uga hadleyno.

Qeybta 2aad: Mashaariicda Sunta Ee Badda iyo Berriga Soomaaliya

- Qeybtani waxa ay ka koobantahay lix maqaal, waxaana aynu ku falanqeynaynaa mashruucyada kala duwan ee ku sahabsanaa sunta lagu shubayey badda iyo berriga Soomaaliya, xilli burbur iyo daggaalo sokeeye dalka ka socdeen, kuwaas oo looga faa'ideystay baylahda uu dalku ahaa dartii.

Qeybta 3aad: Cali Mahdi iyo Mashruucii Yuuraano

- Qeybtan waxa ay ka koobantahay laba maqaal oo ka hadlaya sida uu madaxweynihii hore ee Soomaaliya(1994-1997) ee Cali Mahdi Maxamed uu xidhiidhka ula lahaa mashaariicda sun ku shibidda Soomaaliya mid kamid ah oo lagu magacaabo “Urano Project” Waxa intaas raaca wareysiyo kala duwan oo lala yeeshay, caddeymo qorallo iwm taas oo xaqiijineysa ku lug-lahaansha arrimahaas.

Qeybta 4aad: Weriye Ilaria Alpi iyo Dilkeedii

- Qeybtani waxa ay ka koobantahay saddex maqaal, oo si faahfaahsan uga hadlaya dilka labada weriye oo Talyaani ah, kuwaas oo la kala dhaho: Ilaria Alpi iyo sawir qaade Miran Hirovatin oo magaalada muqdisho lagu diley bishii maarso 1993kii. Waxaanad ugu tagi doontaa qeybtan innagoo tibaaxi doonna in dilkoodu ahaa shirqool iyo dhagar loo maleegay, maadaama ay ku gudo jirtey weriye ilaria Alpi ogaanshaha hubka shari darrada ah ee lagu soo daabulo maraakiibta Talyaanigu uu Soomaaliya ugu deeqay iyo sidoo kale raadinta sunta lagu shubo badda iyo berriga Soomaaliya.

Qeybta 5aad: Falkaaha Iyo Saameyntiisa

- Qeybtani waxa ay ka koobantahay afar maqaal oo ku sahabsan sunta ku aasan badda iyo berriga Soomaaliya falkaaha iyo saameynta halista badan ee ay ku heyso deegaanka tan iyo waagii lagu shubayey. Waxaana ay arrintani sababtey xaalado caafimaad darro oo baahsan taas oo soo foodsaartey bulshada Soomaaliyeed ee xeebaha degan iyo kuwa ka agdhowba, gaar ahaan carruurta oo iyagu aad ugu nugul saameyntaas. Waxaana ay sidoo kale carrabaabeysaa dikhawga ku dhacay badda, berriga iyo xataa hawada oo ay adagtahay sidii uu deegaanku uga soo kaban lahaa.

Maqaal 6aad: Mahadnaq Gaar Ah

- Maqaalkani waxa uu ku saabsanyahay mahadnaq uu u soo jeedinayo halgamayaasha badda ee Soomaaliyeed oo shisheeyuhu u yaqaanno “Budhcad-baddeeda” oo kaalin iyo door aad u muhiima ka qatey ka hortagga shisheeye macmiishey dalkeenna Soomaaliya ee baylahda ah. Waxaana uu tilmamaamayaa haggardaamada shisheeyuhu had iyo gooraale la damacsanyahay halgamayaashaas, ha noqoto dabar-goyn, dhaleecayn, magac-dil iwm. Shakhsi ahaan Cabdifataax Barawaani wuxuu taageero buuxda 100% u hayyaa halgamayaasha badda ee Soomaaliyeed “Budhcad-baddeeda”.

Maqaal 7aad: Rajada Shacabka Soomaaliyeed

- Maqaalkani waxa uu bidhaaminaya ama iftiiminayaa rajo la xidhiidha dhibaatan innagu habsatey ee aan loo kala hadhin sidii loo maareyn lahaa. Waxaana uu ku qotomaa aragtida qoraha ee uu u arko in xal iyo talaba ka noqon karta arrintan. Walow lagu kala aragti duwanaan karo sida arrintan wax looga qaban lahaa, maadaama oo aysan hawl fudud aheyn keliyana dawlad uun wax ka qaban karto, ayaa haddana ay laga maarmaan tahay in qofkasta oo Soomaaliyeed uu ka dhiibto aragtidiisa ku aaddan maareynta dhibaatan dad iyo duunyaba haleeshay.

Hordhaca Daraasadda

Ugu horreynta Eebbaa mahad leh. Waa hubaal in aynnu maqalno ama si fiican uga warheyno dhibaataada soddonkii dabshid ee u dambeeyey ka jirta dalka Soomaaliya, oo dhinac kasta leh haddey noqon laheyd siyaasad, arrimo bulsho, dhaqaale iwm. Waxaa dhibtaas horseed u ahaa burburkii dalka ee 1991kii kaas oo horseeday in dalka Soomaaliya uu noqdo dhul beylah ah oo aan cidna ilaashanin. Intaa kaddib waxaan daraasaddan kaga hadli doonnaa mawdduuc kamid ah aafada iyo halista ku habsatey dalkeenna Soomaaliya oo la xidhiidha dhinaca badaha iyo qeybo berriga kamid ah, oo aad u xasaasi ah ayna tahay in qofkasta oo Soomaali ahi inuu ku baraarugo oo ka warhayo kana digtoonaado dabinka culus ee hooga ku ah bulshadiisa iyo dalkiisa aan cidna u maqneyn.

Aniga oo matalaya ka muwaadin Soomaaliyeed ahaan ayaan qodobkan qalinka u qaatay dabshidkii 2018kii bishii Abriil mar la ila waddaagay maqaal uu qoray Yaxya Caamir oo ah borofesoor ku taqasuusay dhaqaalaha oo bare ka ah Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, kaas oo uu ugu magac maqaalkaas daray “Lacag mar rabo” Waxa uuna ku xusay qormadaa dhexdeeda in sagaashamaadkii uu arrintan sunta lagu shubey badda Soomaaliya uu faraha la galay, deedna khatar ay gashay naftiisu la iskuna dayey in la laaluusho si uu aamuso walow se uu ka biyo diidey arrintaa, dabaddeed mar kale ayaan haddana aqriyey maqaallo lagu daabacay shabakadda balaadhan ee Somalitalk gaar ahaan maqaalo taxane ah oo 2000 ilaa 2009 laga qorayey arrimahan looguna magac daray sunta badaha Soomaaliya ku duuggan.

Ma aheyn markii iigu horreysay oo aan maqlo sun ayaa lagu shubaa ama se lagu shubey badaha Soomaaliya, oo yaraantii iyo beryo dhaweydba dhagaheyga waa kusoo dhici jirtey iyadoo la tilmaamayo arrintaas. Kaddib markii aan soo akhriyey maqaaladii Somalitalk ay qortey oo runtii u muuqdey qaar xog aad u fara badan oo xilliyo kala duwan la qorayey laguna baahiyey shabakadda, ayaan isku dayey inaan xog raadis kale aan sammeeyo si aan wax buuran oo tayo leh bal aan ula wadaaggo bulshada. Sidaas darteed waxaan isu xilsaaray inaan baadhitaan iyo dabagal ku sammeeyo mawdduucan anigoo kaashanaya xogta ay maqaaladaasi xambaarsanaayeen iyo mid aan baadhitaankeyga kusoo helay, walow aanay fari ka qodneyn xogaha laga hayo mawdduucan oo loo baahanyahay in bulshadu kuwada baraarugto si wax looga qabto dhibaataadan.

Haddana intii karaankeyga ah ayaan jeclahay inaan usoo bandhigo bulshada Soomaaliyeed oo ugu yaraan noqon karta iftiimin la iftiiminayo haggardaamada dul hoganeysa badaha Soomaaliya ee baylahda ah. Daraasaddan qoristeeda waxaan wadey muddo toddoba bilood ah taas oo kasoo bilaabmeysa bishii luulyo/July ee dabshidkii ina dhaafey 2018 ilaa bishii Janaayo/January ee dabshidkan hadda aynu kujirno 2019. Waxa sidoo kale cudurdaar buuxda aan ka bixinayaa in aanan tegin goobaha arrintan looga hadlayo, taas oo ku habooneyd in wixii laga wardoono, kulamo lala sameeyo dadka deegaannadaas ku dhaqan, tijaabooyin, muuqaalo iwm laga sameeyo. Iyadoon ugu talo galey in markii hore-ba aan Documentary ka sameeyo arrintan ayaa suurto gal noqon kari weydey sababo badan awgood taas oo sababtey in dib aan u dhigo wixii Documentary-gaas ah.

Waxaan se rajeynayaa mustaqbalka dhow haddii Eebbe idmo inaan baadhitaan loo dhanyahay oo dhameystiran xag kastaba leh aan ka sammeyno aniga iyo intii mawdduuca daneyneysa, kaas oo aan billow ilaa dabshidka markaas lagu jiro aan kaga hadli doono oo maqaal iyo muuqaalba ah, dhaxal galna noqon kara kaas oo aan report-yo wax ku ool ahna ka diyaarin doonno. Waxaanan rajeynayaa in daraasaddani ay noqoto qeyb kamid ah maqaalada laga qorey sunta badaha Soomaaliya. Waxaa iyaduna xusid mudan in mawdduucan aad ka dhex dheehan karto colaadda ba'an ee loo qabo dalkaaga ama dhulkaaga Soomaaliyeed, kaas oo lala damacsanayahay gudaafad adduun weynuhu qashinka iskaga keydiyo, oo aan marnababa lala rabin dawladdnimo iyo dal lamid ah adduun weynaha.

Sidaas daraaddeed waxaad maankaaga aad ku heysaa bulsho kasta hadii la duleysto oo sidii la doonno laga sammeeyo iyada iyo dhulkeedaba in dad iyada dhexdeeda kamid ah ay difaacayaan oo halgan ugu jiraan badbaadinteeda ugu danbeyntiina ay iyagu guushu raaceyso, walow ay naftaba u huraan haddey ku qasabtee. Waxaan ku baraarujinayaa akhristaha in murugada iyo niyad jabka uu maqaalka kala kulmi doonnaa aanay ku reebin quus iyo gacmo laabasho ee adna xil kaa saaranyahay bulshadaada iyo dalkaaga oo lagaaga baahanyahay inaad dhincaaga ka gasho baraarujinta iyo difaacidoodaba. Waxaan hordhaca mawduuca kusoo koobayaa hadalka Eebe weyne ee ah “ Waxaa naxariista Eebbe ka quusta uun kuwa lunsan “ Suuratu Xijri | Aayadda: 56aad

Waxaa xusid mudan eray-bixinta daraasaddan aan kasoo xigtey maqaal ay qortey gabadh Soomaaliyeed oo la dhaho Haboon Xaaji Cabdi 2dii Abriil 2014kii kaas oo ay ugu magac dartey “Soomaaliya oo noqotey dhulkii Sunta - Somalia become the land of poison, waxaana lagu daabacey shabakadda waaga cusub”. Waxaan rajeynayaa oo aan ku hanweynahay in akhristaha uu baadhitankani ugu filanyahay baraarug iyo rejo labadaba, waxaa iyaduna digniin ah in uu digtoonaado muwaadinka raba inuu aafadan baadho oo ka hortago, waxaa dhici karta in naftaadu ay halis gasho adoon ka warheyn sababtoo ah cadowgu ma rabo cid carqaladeysa qorshayaashiisa laakiin arrintani waa ineyna cabsi iyo aamus aanay ku galinin ee waa inaad digtoonaada oo aanad noqonin mid baraad la’ dadka ee waa inaad u heellantahay sidii aad u badbaadin laheyd dalka iyo dadkaaga.

Qeybta 1aad: Billowgii Aafada Badda Iyo Berriga Soomaaliya

Waxa aynu qeybtan kaga faaloon doonna waqtigii ay bilaabmatey aafadii badda iyo Berriga Soomaaliya, oo ah markii la billaabay in adduun weynuhu u adeegsado sida qashinka oo kale badda iyo berriga Soomaaliya. Balse ka hor waddankeenna waxa aynu milicsi kooban ku sameyn doonnaa sooyaalka sun ku shibidda waddamada kale ee adduunka iyo qaab dhismeedkooda. Sunta waxa lagu shubaa laba qaaradood oo kala ah Laatiin Ameerika oo ay kamid yihiin waddamada Venezuela, Hait iyo Santa Domingo, halka qaarada Afrikana ay kamid yihiin waddamada lagu shubo; Somalia, Benin, Guinea Bissau, Nigeria, Mozambique. Sun ku shibidda badaha waddamada aan sheegnay iyo qaar kale-ba waxa la adeegsadaa wax la dhaho “Ecomafiya”: waxa ayna yihiin gangs ama tuugo ka talaabsada xeerarka iyo qawaaniinta caalamiga ah ee lagu xakameeyo bad, berri iwm.



Mararka qaarkood-na waddamada sunta daadinaya ayaaba la kaashada gangs-ka oo ay is isbaheystaan. Sunta badaha lagu shubayo ayaa ah qeybo badan oo ay kamid yihiin: Qashinka Nuclier-ka warshadaha, warshadaha kiimikada sammeeya (acids, milayaal sun ah, daawooyinka dhacay, iwm), daawooyinka dadka iyo xoolaha, bacrimiyayaal kiimikaaleed (Chemical fertilizers), daawooyinka cayayaanka (Besticides), dambaska kasoo hadha qashin la gubey, shaybaadhada kiimikaalis ka ah, warshadaha caaga iwm. Waxa ay dadka arrintan baadhey ay qabaan in bilowga qashin ku shubidda badaha dalal Afrikaan iyo Latin Ameerika ah lagu war helay 1970kii, markii la arkey warbixintii ugu horreysay ee xidhiidho qarsoodi ah oo dhex maray waddamo Afrikaan ah iyo waddamo Reer Galbeed ah sida Faransiiska, Jarmalka, Ingiriiska, Midowgii Soofiyeetka, Talyaaniga iyo Switzerland.

Qorshayaasha sunta loogu shubo badaha waa ay badanyihiin oo waa isa soo daba tarayaan maalinba maalinta ka dambeysa, se laakiin kuwa dalal afrikada kamid ah ay ku sahabsan waxa aan ka xusi doonnaa laba qorshe oo kala ah: 1988kii dawladda Benin ee afrikada galbeed waxa ay wada xaajood dhexmaray Faransiiska kaddib waxay ka ogolataay qashin fara badan oo u badan hadhaaga jaadka nuclier-ka ee loo yaqaan “Radioactive”, waxa ayna dawladda Faransiisku u hormarisey lacag dhan 1.6 million dollar iyo soddon dabshid oo France ay ka kaalmeyso xaga dhaqaalaha waddanka. Nasiib wanaag se kacdoono ka yimid dadweynaha reer benin heshiiskaas ma hawl gelin oo waa joogsaday, waana hubaal in dadweynuhu ay ka warhayeen qashinkaas Khatartiisa sidaa darteed ay kacdoonno u sammeeyeen. Waxa kale oo iyaduna xusid mudan in heshiis marka lawada galayo oo u dhexeeya cida sunta daadineysa iyo cida qaadaneyna ay laba siyaabood ba mid noqon karto.



Ta koobaad: in dawladda qashinka daadineysa ay heshiis la gasho dawladda qashinta lagu daadinayo sida tan aan kor kusoo sheegnay iyo in dawladda qashinka daadineysa ay heshiis la gasho dadyow gaar ah sida qorshahan: 1987kii waxa heshiis wada galay shirkad Talyaani ah iyo nin Nigerian ah waxa ayna ku heshiiyeen in waddanka Talyaaniga laga dhoofiyo qashinka halista ah ee lagu keydiyo isagoo foostooyin ah dabcan waa radioactive-ka, lana geeyo dalka Nigeria gaar ahaan dhulal uu lahaa ninka heshiiska la galay talyaaniga. Bishiina uu boqol dollar ku qaato oo khidmad ah foostadii sun ahba. Heshiiskan wuu fuley waxaana lagu war helay markii foostooyinkii ay bilaabeen in ay sunta sii daayaan, shaqaale badan oo Nigerian ahna ayaa u adeegsida maareyntooda ku naf waayey. Haddaba waddankeena Soomaaliya waa hubaal in labadan hab ee soo sheegnay ay ka dhex jiraan, sababtoo ah dagaaladdii sokeeye intii uu socdey sagaashamaadkii dadyow isugu jirey kuwo magacooda ku socdey iyo kuwo magaca dawladda Soomaaliya ku socday.

Waxa ay la gorgortameen heshiisna la galeen shirkado reer galbeed ah, siiba kuwa Talyaani iyo Switzerland ah, si ay qashinkaas halista ah oo gaadhaya 500kun oo Ten ay Soomaaliya ugu soo waaridi lahaayeen. Waxa iyaduna xusid mudan in ku sun ku shibidda Soomaaliya ayna keliya billaabtan dagaaladdii sokeeye se ay ka horeysay sida taariikhdu ay caddeynayso iyo qorshayaasha lagu bar tilmaameedsanayey badaheena iyo dhulkeena tusaale: badhtamihii 1970kii waxaa badaha Soomaaliya ka kaluumeysan jirtey shirkad la odhan jirey SomalFish oo ay ku midoobeen Soomaaliya iyo Midowgii Soofiyeetka. Waxaanay shirkadaasi maraakiibteedu ka koobnaayeen toban markab. Waxaanay sannadkii qaadi jireen oo ka ganacsan jireen saddex kun iyo afar boqol (3400) oo ten oo kalluun ah. Keddib isku dhacii dawladda Soomaaliya iyo Midowgii Soofiyeetka, waxa dabshidkii 1983kii haddana la aasaasay shirkad kalluumeysi oo la odhan jirey marka magaceeda la soo gaabiyo Shifco(Somali High Seas Fishing Company), ayna ku midoobeen Talyaaniga iyo Soomaaliya.

Waxa aanay shirkaddan ku shaqeyn jirtey shan markab oo deeq ahaan Talyaanigu u bixiyey. Waxa ay hay'adda FAO (Food and Agriculture Organization) qoraal ay qortay 18kii noofembar 1998kii ku sheegtay in maraakiibtii shirkadda kalluumeysiga ee shifco ay ahaayeen shan markab oo kala ahsidatan: 21ka Oktoobar, Faarax Oomaar, Cusmaan Geedi Faarax, 21kii Oktoobar ee seddexaad iyo 21kii Oktoobar ee afraad. kowdii julaay/luulyo 1988kii ayaa waddamada yurub ay joojiyeen in ay kalluun u keenaan maraakiibtaasi, go'aanka lagu mamnuucayna waxa uu ahaa 97/296/EC. Shaki igagama jiro in reer galbeed sababta ay kalluunka badaha Soomaaliya ku diideen ay tahay in sunta badaheenna lagu shubo ka warhayaan ama iyaguba kamid yihiin kuwo ku shubaya, sababtoo ah lagama yaabo sun ay dhulkoodii iyo badahoodii u quudhi waayeen in dal ay badahiisa ku shubeen, haddana kalluunkiisa qaataan oo shacabkooda ku quudiyaan. Haddaba aafada badaha Soomaaliya waxaan odhan karnaa inuu la billowday wada shaqeyntii Talyaaniga iyo Soomaaliya, markii ay wada aasaaseen dabshidkii 1983kii shirkadii Shifco. Waxa aan aragtidaa ku xoojinayaa in mashaariicda loogu talo galay in sunta hadhaaga ah loogu shubo badaha Soomaaliya ay billowdeen 5tii Ogoosto dabshidkii 1987kii.



Sawirkani waa Markabkii 21 Oktoobar oo kusoo caaryey xeebaha Soomaaliya.

Dalka qorshahaa lagu dejiyeyna waxa uu ahaa Talyaaniga gaar ahaan magaalooyinka Milaano iyo Rooma, looguna magac daray mashruuca Yuuraano (Yurano Project). Sida ay warbixinnooyinka iyo baadhitaannada arrinkan laga sameeyey ay sheegayaan, tusaale ahaan wargeyska Washington Post caddadkiisa soo baxay 24kii Janaayo/January 1993kii waxa ay cinwaan uga dhigtey “Xidhiidhka Talyaaniga: Sidii ay Rooma u caawisey Burburka Soomaaliya“. Jariidadda ayaa wax lala yaabo ku tilmaamtay sida uu Talyaanigu u burburiyey Soomaaliya, isagoo isticmaalayey habka loo yaqaan Mashaariic aad u baalladhan, oo haddana aan waxba dalka ku kordhinayn ama sii burburiyay. Waxaana jariidadu tusaale u soo qaadatay in Talyaanigu uu Soomaaliya ka “hirceliyey” ilaa 114 mashruuc intii u dhaxaysay 1981kii ilaa 1990kii, oo ay ku baxday lacag gaadheysa billion dollars.

Marka laga reebo mashaariic kooban (sida mashruucii tallaalka ee hay’adaha aan dawliga ahayn). Nidaamkii Talyaanigu waxa uu ahaa wax aan caqliga geli karin iyo khasaaro. Jariidadda oo arrimahaas farta ku fiiqeysey waxay tidhi: “Qiyaastii \$250 million oo doolar ayaa lagu kharash gareeyay jidka isku xidha Garoowe ilaa Boosaaso, kaas oo dherer kiisu yahay 450 kilometers, jidkaas oo xoolaha reer baadiyihu ay lug kaga gudbaan. Qoraa Soomaaliyeed oo markii ugu horeysey booqday Jidka laamiga ee isku xidha Boosaaso ilaa Garoowe ayaa aad waxa uu ula yaabay jid laami ah oo dhex-jiifa toggaga, oo



FG: Jaantuskani waa Waddada Garoowe iyo Boosaaso

aan Buundo lahayn, gaar ahaan xilliga roobku da’o oo ay khasab tahay in laga istaago ilaa biyuhu togga ka dhammaanayaan. Qoraaga waxaa loo sheegay in ay dhacday maalin roob da’ay in qof dhakhtar degdeg ugu baahan gaadhi lagu qaaday, laakiin maadaama uu laamigu dhex jiifo togga ay biyo xoog leh marayeen, in muddo saddex maalmood ah qofkii xanuunsanaa lagu hayey gaadhigii, oo taagnaa gebiga kale ee togga oo loo gudbin waayey magaaladii dhakhtarku ku yaaley.

Washington Post, waxa ay qortay: “Muqdisho cisbitaal ku yaalla waxaa lagu kharash gareeyey \$40 million oo lagu dhigay qalab aan farsamadiisa la socodsiin karin, muddo kooban ayuuna qalabkiina ku baaba’ay“ Xitaa Jaamacadda Muqdisho oo Talyaanigu hirgeliyeen waxaa macallimiinta Talyaaniga ah la siin jirey mushahar macallin kasta oo gaadhaya inta u dhaxaysa \$16,000 — \$20,000 bil kasta. Dad madax ah oo ay Jariidaddu waraysatay ayaa sheegay in mashaariicda wax soo saar Wadaagga ee dhex maray Talyaaniga iyo Soomaaliya aan wax tixgelin ah lagu siin jirin raadka ay ku reebayaan mujtaamaca Soomaaliyeed. Arday dhigan jirey Jaamacaddii Muqdisho ayaa xusuustay: “In Jaamacadda la keenay Telefoon casri ah oo lacag aad u qaali ah laga soo bixiyey oo lagu dhejiyey derbiga muddo koobanna la waayey meel ay telefoonadii ka bexeen “Sidoo kale waxaa jaamacadda loo keenay Computero, waxaana computeradii la geeyey suuqa halkii ardayda jaamacaddu ay wax ku baran lahaayeen. Macallin jamacadda wax ka dhigi jirey ayaa yidhi “Marka aan jaamacadda Muqdisho laba sano wax ka dhigo, waxa aan guri weyn ka dhisan doonaa xeebaha loo tamashleyn tago ee dalka Talyaaniga! – sidaas ayaa lacagtii dib loogu celiyey Talyaaniga. Soomaali badan ayaa is weydiinaya, haddii xaalku sidaas ahaa xilligii ay Soomaaliya dawladda ahayd, hadda oo aan dawladi jirin xaggee xaalku joogaa? Waxa aanay arrintani u muuqataa mid lawada ogyahay oo aan sinnaba u qarsooneyn, in Talyaanigu horboodayey aafadaha badaha Soomaaliya. Qaran jabkii dawladeenna iyo burburkeediiba, raga ka qeyb qaatay in sunta badaha Soomaaliya lagu

shubaana waxa ay u badanyihiin Talyaani, sida: (Giancarlo Marocchino) oo ah ninka ka gacan geystay dhisidda dekada ceel-macaan ee Muqdisho u dhow, suntana ku aasay Warsheekh ilaa Mareeg. Aafada badaheenna waa hubaal in ay ka gacan geysteen dad Soomaali ah, balse shisheeyaha cid uga badan ma jirto, sababtoo ah waxa la adeegsadaa GANGS si sunta badaha loogu shubo, oo ay kamid yihiin maafiyada Talyaanigu, wada shaqeyn fiicanna way ka dhaxeysaa dad u jooga dalka si hawshu ugu fududaato oo dhuuni raac ah. Haddaba waxybaaha isweydiinta mudan ayaa ah waxa aynu ognahay in ciidamo shisheeye ay badda Soomaaliya ilaaliyaan, markaa sidee ku dhacday in haddana aafadan badaheenna ku habsato?



Arrintani waa mid u eg dhalaan habaabis, ciidamada badda Soomaaliya jooga waddamadooda ayaa ka qeyb ah ku shubidda sunta badaha Soomaaliya. Markaa lagama yaabo in ay ka hor istaagaan dadkan sunta ku shubaya badaheenna. Sidoo kale ciidaman badda inoo jooga waxaabey ka hortagaan cid kasata oo isku deyda in ay cadowga inaga dhiciso sida “budhcad-baddeeda Soomaaliyeed” oo magacan loo bixiyey aan runtii ka yaqyaqsanayo inaan ugu yeedhayo, maadaama ay ka sharaf badanyihiin, oo ah xooga qudha ee aynu haysanno ee badaha inoo ilaaliya, haddana iyaga waxa carqalad ku noqdey ciidamadan shisheeyaha ah oo iyagu gumaad iyo dil joogta ah ku haya budhcad-baddeeda oo macnuhu waxa weeye “Iga sifee wixii mashruuca carqaladeynaya”. In gacan lagaga hortago iska daaye in xataa af lagaga hortago ayeyna ogoleyn cadowgu oo qofkii arrimahan oo kale baadh-baadha ama kashifa oo daaha kafeyda waa la ugaadhsadaa, tusaale ahaan sidaan qeybaha dambe kaga hadli doono, dilka weriye Talyaani ah oo magaceeda la yidhaa ilaria Alpi oo arrintan darteed muqdisho u timid waa la khaarijey 1993kii.

Sidoo kale Franco Oliva: wuxuu ahaa lataliye dawladda Talyaanigu u dirtey Soomaaliya wuxuu diyaariyey warbixin uu ku dalbanayo In la joojiyo caawimaada sida qaldan loo adeegsado, keddib weerar lagu qaaday waxaa xabad looga dhufatay lugta midig, deedna wuxuu dib ugu noqday Talyaaniga wakhtigaasina wuxuu ahaa shan bilood ka hor dilkii ilaria alpi. Waxa sidoo kale isla sagaashamaadkii ku dhacdey arrin aad u qatar ah: waa dhaqaale yahan Soomaali ah oo magaciisa la dhaho Prof. Yahya Amir, markii uu arrintan ku baraarugey sunta badaha Soomaaliya ayuu u tafa xeytay inuu intii



FG: Sawirkani waa franco Oliva

karaankiisa ah inuu ka hortago, oo wuxuu waraaqo u gudbiyey hay'addo iyo dawladda Talyaaniga, keddib wuxuu tagay dalka Talyaaniga arrimo la xidhiidha arrintan, waxa la isku dayey in la laaluusho oo afkiisa ama qalinkiiisa la hor istaago se waa ka biyo diidey, keddib si deg deg ah ayuu uga soo baxay dalka talyaaniga oo wuxuu is dhahay hadii qalinkaagii la aamusiin kari waayey naftaada ayaa markan la aamusiin oo waa lagu dili. Dabcanna waa ku saxnaa middaas haddii kale isaga ayaa la dili lahaa inta maafiyo loo adeegsado haddii uuna si deg-deg ah uga bixi laheyn dalka Talyaaniga. Qisooyinkan iyo kuwa ka khatarsan ayaa ka dhaca mashruucan haddii aad faraha la

gasho, se taasi marnaba qofka muwaadinka ah ee dalkiisa ama dadkiisa badbaadinaya ma aha iney baqo geliso, baqo gelintu waa qorshaha cadowga, in aad baqataana waa fal celinta fuleyga ee ma aha falcelinta geesiga/geesiyada muwaadinka ah. Arrintan ayaa waxa gudaha Soomaaliya ay si aad ah usoo shaacbaxday ama lagu baraarugey dabshidyadii 1992kii ilaa 1998kii oo ah markii ay kordhiyeen dhaqdhaqaaqii sun ku shibida badahaha Soomaaliya, iyadoo ay ka faaideysanayeen dawladda burburtay ee aan bad iyo barri toonna war ka heyn. Maalinba maalinta ka danbeysa cadowga dhulkeennu waa isa soo tarayaa oo badanayaa, iyadoo si hoose iyo si muuqataba laysku wada gaadhsiinayo dhulkan sidii hilibka suuqa wadhan ee dadkiisiina mooganaanta ku jiraan in sidii la doono laga yeelo. Warbixinaha qaar waxa ay sheegayaan in badaha Soomaaliya lagu shubay afar million oo Ten oo sun ah (4,000,000 Ten).

Sidoo kale warbixin la soo saaray 2016kii waxay sheegaysaa in afar dabshid kaddib oo ku beegan 2020 aan badaha Soomaaliya wax kalluun ah laga guran karin, sababtoo ah kalluunka dhammaantii wuu wada sumeysanyahay. Kolley sunta badaha lagu aasay maalinba maalinta ka danbeysa way soo kaaheysaa oo khatarteedu way sii kordheysaa oo isku mid ma aha markii lagu shubay badda iyo hadda waa mudo waqti dheer u dhaxeeyo, maadaama sunta lagu soo cabbeeyey foostooyoyin marka ay cimilada kulul ee afrika la falgalaan daadanaya oo gaadhaya bad,berri iyo hawadaba, sida aynu hore ugu soo sheegnay dhacdadii dalka nayjeeriya.



FG: Jaantuskani Foostooyinkii soo caariyey Tsunami-gii 2004tii

Waxa sidoo kale xusid mudan bishii febraayo 2005tii warbixin ay soo saartey hay'adda Qaramada Midoobey u qaabilsan deegaanka ayaa sheegtay in aafadii badgariirka ee dhacdey ay soo gaadhay badaha Soomaaliya taas oo sababtay in ay soo firdhiso qashinkii iyo suntii ku duugna badaha guntooda hoose, sababteyna khatar caafimaad oo baaxad weyn oo soo food saartey mujtamaca Soomaaliyeed. Af-hayeenka UNEP Nick Nutall isagoo u warramaya idaacadda VOA 2005tii ayaa waxa uu yidhi: “ In 15kii dabshid ee lasoo dhaafey in shirkado Reer Yurub ah iyo kuwa kaleba ay Soomaaliya u isticmaali jireen goobta lagu duugo qeybo kala duwan oo sunta nooca loo yaqaan (Nuclear) iyo qashinka loo yaqaan (Hazardous Wastes), waxa uu intaas raaciyey: “ Waxa halkaas ku jirta sunta shucaaca ee uranium, sunta maduulka ee leads, sunta biraha ay kamid yihiin cadmium iyo mercury, qashinka warshadaha, qashinka cisbitaalada, qashinka kiimikada ah iyo sun kasta oo la magacaabo”. Sidoo kale waxa uu haddana intaas ku darey “khabiir qamar sanaaciga yaqaan ma aha inaad noqotid si aad u fahamtid sababta ay sidaas u sameynayaan ee waa deganaansho la'aanta halkaas ka jirta awgeed “. Kaddib wuxuu sidoo kale sheegay in shirkadaha reer Yurub ay halkii Ten ee sun ah laguna duugayo Soomaaliya ay ka bixiyaan 2.5\$, halka ay ku bixi laheyd 250\$ haddii suntaas lagu aasi lahaa Yurub.



Sawirka: Nick Nutal

Sunta lagu shubay Soomaaliya keliya kuma eka badaha ee xataa waxa lagu aasay barriga/dhulka. Waxaa la sheegaa in dekadaha qaar sida: dekada ceel-macaan, warsheekh uu Talyaanigu u dhisey si uu sunta ugu aaso, sidoo kale waddooyinka qaar sida; waddada Boosaaso ilaa Garoowe u dhaxeysa waa lagu aasay. Waxaana uu Af-hayeenka UNEP intaas ku daray in badgariirkii ka soo billowday Aasiya uu burburiyey ama kala furfuray haamihii ama fuustooyinkii iyo waxyaabaha kale ee suntaasi kujirtey, kaddibna waxa hirarkii baddu aay sunta u xambaareen ilaa 10 kiiloomitir oo gudaha dalka ah (ama berriga ah). Waxaana uu sheegay in aysan macquul ahayn in la ogaado inta Ten ama tirada waxyaabaha ay suntaasi kujirto ee yaalla xeebaha Soomaaliya, laakiin waxa uu sheegay in arintu ay “Halis weyn tahay”. Waxa iyaduna jirta hadal uu 5tii bishii Juun dabshidkii 2005tii oo ku beegnayd maalinta deegaanka ee adduunka hadal uu yidhi mar laga wareysanayey dhibaatooyinka xaga deegaanka ee Soomaaliya heysata Xoghayaha joogtada ah ee Wasaaradda Deegaanka iyo Maareeynta Aafaoyinka Dr. Qaasim Xirsi Faarax: ”Intaa waxaa ka sii daran sunta la taaban karo ee lagu aasay ama lagu daadshay bad iyo berriba, siiba midda muuqata ee dul ceegaagta xeebaha dalka. Waxaas oo dhamina waxay sababaya cudurro halis ah oo si tartiib tartiib ah uga dillaaca dalka iyaga oo waxyeelaynaya kulli dadka, duunyada iyo daaqoodaba. teeda kale ta ugu darani waa in aan dib dambe loogu noolaan doonin geyigaan haddaan iminkaba la daba qaban oo laga deyn waxyeelaynta deegaanka”.

Waxa haddaba qof walba oo Soomaaliyeed is weydiinayaa oo maankiisa kusoo dhaceysa marka aynu arrimahan sidaas u halista ba’an ee innagu habsadey ka soo hadalney tolow miyaaney mushkiladani xeerar qabta oo ka xakameeya xad-gudubta intaas le’eg ma la waayey? Warcelintu waa caksiga oo waa jiraan xeerar iyo heshiisyo in ay xakameeyaan loogu talo galey, laakiin adduunkan maanta aynu noolnahay sharcigu wuxuu qabtaa midka tabarta darran hore-na Soomaali waxa ay ugu maahmaahdey: “Miskiin baa misko la fuulo leh”. Waxa jira xeerar caalami ah oo loogu talo galey xakameynta iyo ka faaideysiga qashinka sunta halista ah



ee warshadaha, marka ay xudduudaha u kala goosheyso, keydintinteeda iwm. Heshiisyadaa waxa kamid ah: Axdigii Basel (Basel convention on the control of transboundary movements of hazardous waste and their disposal) ee ay dabshidkii 1987kii oo ay ku kala saxiixdeen 116 wadan oo markii hore ka koobnaa 29 qodob iyo 7 lifaaq, ayaa bishii Noofembar 2000 waxa laga tuurey 9 lifaaq waxaana saxeexay 141 dal. Fiiro-gaaar ah: Soomaaliyana kama mid aheyn dalalkaas saxeexay heshiiska.

Hay'adda qaramada midoobey u qaabilsan arrimaha deegaanka ayaa iyaduna waxa ay qaadatey baaqii kasoo baxey qaahira (Cairo guidelines and principles, for environmentally sound management of hazardous wastes) kaas oo tilmaamo aqoon ku dheehantahy ka bixinayey sida ugu haboon ee loo maareyn karo suntaas halista ah marka loo eego dhibaataada deegaanka ku iman karta. Waxyaabaha xeerka qaahira meelmariyey ayaa waxaa kamid ah: haddiiba ay dhacdo in laba waddan ku heshiiyaan kala iibsiga/gadashada qashinkaas ay tahay waajib saaran ka dhoofinaya inuu hubiyo in halka qashinku ku dambeyn doonaa ay tahay meel ku haboon oo khatarta ka imaan karta ay tahay mid aad u yar marka laga hubiyo wejiyo kala duwan. Dabshidkii 1989kii Golaha loo wada dhanyahay ee qaramada midoobey(UN GENERAL ASSEMBLY) kala fadhigiisii 44aad, wuxuu ku guddoonsadey qaraarkii tirsigiisu ahaa 44/226, oo isaguna loogu talo galey xakameynta dhibka qashinkaasi

dhoofintiisu keento. Waxaa kale oo kamid ahaa; axdiyadii UNCLOS (United Nations convention on the law of the sea) iyo London Dumping Convention oo iyaguna dhacey 1989kii, ayaa ujeedadoodu aheyd in laga hortago in dhib loo geysto deegaanka dabiiciga ee badaha adduunka.

Heshiiska london waxa uu si gaar ah u khuseeyey sidii badaha looga bedbaadin lahaa sunta iyo qashinka haraaga nuclear-ka ee radiocative-ka loo yaqaan. Heshiiskii (LOME IV) ee u dhexeeyey waddamadii hore u ahaan jirey guumeystayaasha, haddana ku bahoobey Midowga Yurub iyo waddamadii la guumeysan jirey ee Afrika, Latin America iyo Jasiiradaha badweynta baasifigga ayaa wuxuu xaaraantimeynayaa in qashinkaas halista ah loo dhoofiyo waddamada soo koraya. F-G: Waddamada soo koraya waa Asia, Afrikana hadal keedaba daa. Waxaa iyaguna jira heshiisyo heer gobol ah sida: Axidigii Bomako(Bomako Convention) oo ah midkii Midowga Afrika kaga mamnuucey xubnihiisa lasoo degida iyo ka ganacsiga qashinkaas halista ah, heshiiskani wuxuu si gaar ah u tixgelinayaa badaha oo asalkiisaba waxa uu ka dhashay markii afrika aragtey in xeerarka caalamiga ah oo keliyi aaney ku filneyn ee heer qaaradeedna loo baahna. Waxa ay Latin America iyaguna dhankooda isla meel dhigeen “Accuerdo Regional Sobre Movimiento Transfronizo de Desechos Peligrosos”. Waxa sidoo kale isna jira (IZMIR Protocol) oo isna khuseeya badda iyo gobolada mediteranian-ka iyo sidoo kale (WAIGANI TREATY) oo ay ku bahoobeen waddamada yar yar ee jasiiradaha ah.

BAMAKO CONVENTION ON THE BAN OF THE IMPORT TO
AFRICA AND THE CONTROL OF TRANSBOUNDARY
MOVEMENT AND MANAGEMENT OF
HAZARDOUS WASTES WITHIN AFRICA

Waxaa xusid mudan haddaba iyadoo qawaaniintani ay wada dhaqan gashay ayaa haddana waxaa jira waddamo muhiim ah oo ka meeraysanaya ama ka cago-jiidaya in ay saxeexaan heshiisyadan, kuwaas oo u badan kuwa sunta daadiya, rabana in ay ka dul tallaabsadaan xeerarka oo budhcadnimo, boob ku joogaan iyo weliba kuwo Afrikaan iwm ah oo raba ka macaashida qashinkaas halista darran. Waxaa kaloo nasiib darraa in dhammaan axdiyadan iyo heshiyyadani ay ku fashilmeen in la xakameeyo dhibka ay arrintan halista ahi dhashay. Tusaale ahaan Afrika ayaa dunida ugu wada filan halkaasoo dawladdaha qaarna si cad oo ogaal ah ugu xad-gudbay xeerarkaas (Sida Benin, Guinea-Bissau iwm) iyagoo daliishaday ama cuskaday inay doonayeen inay qashinka reer galbeedka qaataan si ay uga samato-baxaan dhaqaale yarida heysata ee ku habsatay dalalkooda. Waddamo kale-na sida Soomaaliya aysan dawladda ba laheyn muddo aad u dheer iyo qaar hore-ba usii joogey dalka oo hunguri iwm ay ka qaalib noqdeen oo diir naxa aanba laheyn. Waxaana ay u muuqataaba arrintu in Soomaalidii laga hayo ciidooda oo shisheeyuhu kahor joogaba. Waxa iyiduna xusid mudan hadal uu yidhi Ahmed Ould Abdullah oo ahaa wakiilkii UN-ka ee Soomaaliya mar uu ka hadlayay arrintaan qashinka wuxuu yidhi: “Shirkadaha qashinka ku quba Soomaaliya waxay lacag badan siiyaan wasiiradda dawladda ku meel-gaadhka ah, dawladd goboleedyadda jira, madaxda maleeshiyo qabiileedka “ wuxuuna ku daray “ Soomaalida manta waxa ku yar inta damiir iyo waddaniyad u haya dalkooda iyo dadkooda, wax kasta waxaa kala wayn in jeebkiisa lacag gasho! “

FG: Sawirkani waa Ahmed Ould Abdullah



Qeybta 2aad: Mashaariicda Sunta Ee Badda iyo Berriga Soomaaliya

Qeybtan waxa aynu kaga faaloon doonaa mashaariicda sunta loogu talo galey in lagu shubo badda iyo berriga Soomaaliya oo ah mid aad iyo aad u muhiima marka mawduucan sunta badaha Soomaaliya aynu joogno, aadna uga xasaasisan qeybtii koobaad ee taxanahan sunta. Qeybtan waxa ay innaga caawin kartaa in aynu ogaanno mashaariicda goobaha lagu fuliyey ee sunta lagu shubey si aynu ubadbaadino dad iyo duunyaba intii karaankeenna ah, walow aynu kasoo daahney. Haddana hadda kedib oo wax laga qabtaa waxa dhaanta hadda oo wax laga qabto.

Walow mashaariicdu badanyihiin oo marba marka ka dambeysa isasoo tarayaan, haddana waxaan halkan ka warhayaa mid loogu magac darey “JASIIRADA CUSBADA“, oo badhtamihii dabshidyadii sideetamaadkii ay faransiiska iyo mareykanku qorsheeyeen. Ujeedka mashruucan ayaa daarnaa raadinta iyo helidda marka hore goobo lagu keydiyo sunta iyo qashinka hadhaaga ah ee nuclear-ka loo yaqaan taas oo ka timaada warshadaha waddamadaas qorsheeyey iyo qaar kale-ba. Qashinkaas sunta ah ayaa guud ahaan waxa loo qaybin karaa laba qaybood oo kala ah: Qayb kala-hufid iyo nadiifin dheer, keddib deegaanka dabiicigu dib u adeegsan karo (recycled) iyo qaybta labaad oo ah mid aan waxba lagaga qaban karin qaababka kala duwan ee hoos loogu dhigo heerka iyo awoodda suntaas, taas oo marka xalka keliya ee u bannaan uu yahay in si laga feejignaadey loo ilaaliyo. Ilaalintaasna iyo feejignaanteedana qaaraha Afrika iyo Aasiya midna ma heysto.



Sunta hadhaaga nuclear-ka ayaa qaybtan soo hoos galaysa. Haddaba joornaalka toddobaadlaha ah ee kuyaal dalka Talyaaniga oo arrimahan si qoto dheer ugu kuurgaley ee lagu magacaabo Famiglia Crsitiana(FC) ayaa isaga oo soo xiganaya dad muhiima oo la xidhiidha sirtoonka reer galbeedka oo aan la dooneyn in la magacaabo, ayaa sheegay in ugu dambeyntii mareykanka iyo faransiisku ay ogolaadeen taabagalka mashruucaas si loo hirgeliyo. Arrinta haddaba isweydiinta mudan waxa ay tahay maxaa magacan loo doortey? Jasiiradda Cusbada ee loogu macadarey Waa tuma? Xaggee se ku taal jasiiradaasi? Inkasta oo magaca ay soo hoos galayaan meelo badan oo mashruucu u gartey fulinta hawshaas, ayaa haddana goobta ugu weyn oo magacanna laga soo qaatey ee la sheegayaa waa “XAAFUUN” oo ka tirsan gobolka Bari, oo sida la sheego ah halka laga helo keydka adduunka ugu baaxadda weyn ee cusbada/milixda ah, taasoo sida la ogyahay tusaale ahaan qarnigii dhammaadey ee labaatanaad u dhoofin jirtey dalka Hindiya milix aad u fara badan.



Haddaba waxa kale oo isweydiin mudan Maxaa Xaafuun loo doortey? sida uu qabo Mr. Aldo Anghese oo ah nin la shaqeeya sirtoonka dalka Talyaaniga, ayaa tilmaamey Xaafuun waxyaalaha lagu doortay waxaa ka mid ahaa dabeecaddeeda juquraafiyeed: Waxay ku taal buu yidhi waa meel lama degaana, dadka iyo duunyaduna ku yaryihiin. Waa meel si dabiici ah go'doon u ah buu yidhi oo xagga badda maahee aan berriga looga iman karin. Waxyaalaha lagu doortay Xaafuun waxaa ka mid aha ayuu ku darey iyadoo ay adagtahay xitaa in xagga cirka laga arko, xitaa haddii diyaarad lagu dulmaro. Si kastaba ha ahaatee, Joornaalka FC wuxuu xaqiijiyeey in

documents-kii gabagabada ee mashruucaas lagu codsanayey in la aasaaso meelo qalcadaa oo loogu talagalay ilaalada iyo dhisidda difaac adag oo xagga cirka ah. Goobaha kale ee kamida gobolada Waqooyi-Bari ee la sheegay in sideetameeyadii lagu qubey qashinkaas waxaa kamid ah Xeebta Caluula iyo waddada u dhaxeysa Garoowe iyo Boosaaso sidaan horeba usoo sheegay. Joornaalka Famiglia Christiana waxa uu sheegay in meelaha kale ee mashruucan kamida ay ku jirto meel ku taal Waqooyiga Hobyo (Mudug) oo magaalada u jirta 10km xeebtana 5km. Suxufiyiinta Famiglia Christiana oo wada marey dhammaan Soomaaliya(laga bilaabo Hargeysa ilaa




Kismaayo) dhammaadkii 1998kii ayaa waxa ay diyaarad ku tageen Hobyo sidey sheegeen, si ay bal goobtan u soo arkaan, haseyeeshee wey suuroobi weydey kaddib markii ninkii pilot-ka ahaa baqdin darteed uu diidey inuu ku dego goobtaas. Sida ay qabeen goobtan Hobyo waxa ku jirta sun aad u halis ah iyo qaar radioactive ah. Waxaana ilaaliya ciidan ajnabi ah, weliba intii markaas(1998) si aad ah ayaa loo ilaalinayey oo haddey diyaarad dul marto waa lasoo ridayaa ayuu yidhi ninkii suxufiyiinta watey.

Dabshidkii 1987kii ayaa waxa kale oo jira mashruuc laga qanqaabiyeey dalka Talyaaniga oo loogu magac darey “YUURAANO” saldhigiisuna uu ahaa magaalooyinka Milano iyo Roma. Haddaba ujeedka mashruucan ayaa waxa uu daarnaa in saddex meelood oo saxaraha lama degaanka ah ee Soomaaliya,Asia iyo meelo kale-ba lagu soo aaso xaddi aad u fara badan oo sunta iyo hadhaaga qashinka kiimikada oo noocyo kala duwan isugu jira. Mashruucani waa fuley oo 15kii Ogoosto ee dabshidkaas 1987kii ayaa la saxeexay oo ay gadhwadeen ka ahaayeen niman lakala yidhaahdo: Elio Saccheto oo ka socdey shirkadda(Minera Rio de Ora) oo saldhigeedu yahay magaalada Lugana ee dalka Swizerland iyo Luicano Spada oo ka socdey shirkadda(Instrumag) isla markaana ahaa ninka u qaabilsan arrimaha kobcinta dhaqaalaha ee xisbigii ugu weynaa waayahaas Talyaaniga ee Hanti-Wadaagga ahaa (PSI – Partito Socialista italiano) ee uu madaxda ka ahaa Betino Craxi oo ahaa Raysal Wasaarihii Talyaaniga dabshidyadii 1983kii ilaa 1987kii. Wuxuuna geeriyooday 19kii Bishii Janaayo ee dabshidkii 2000. Waa Raysal Wasaarihii ugu horreeyey ee Soomaaliya yimid.



Sawirka: RW Betino Craxi

Guido Garelli oo ah ninka xayeysiiska u qaabilsanaa mashruucan ahna nin maxkamadaha Talyaanigu daba joogeen dhowr jeerna loo xidhey qashinka suntaa iyo hub uu ugu beddelo dad uu la garabka yahay ee waddamada Afrikaanka. Sida baadhitaan la sammeeyey lagu helay ninkani wuxuu ku shaqeysan jirey saddex aqoonsi oo kala ah (mid Soomaali ah, mid Talyaani ah, mid Saxaraha Galbeed ah(Polisario). Waxaa iyaduna xusid mudan laba arrimood oo aad u muhiim ah: Ta koobaadi: Waa arrinta mashruucani ma aheyn mid qarsoodi ah, sida documents-ka laga akhriyeyna dhoofinta wasakhdaasi waxa ay aheyd mid waafaqsan sharcigadalka Talyaaniga(Italian Low) iyo sharciga caalamiga ah labadaba (International Low).



Waxyaabaha lagu suntey in ay goobahaas u dhoofinayaan waxa kamid ahaa: sunta cayayaanka oo dhacdey, hadhaa daawooyin, qashinka warshadaha iyo qashin hadhaa ah oo aan noociisa la aqoon . Sunta cayayaanka ee dhacdey ee la daabulayo waxa kamid ah: Dawo lagula daggaalamo ilma-argtida Fangaska, laguna daweeyo iniinyaha oo loo yaqaan “HEXACHLOROBENZENE”. Haddaba dawadan ayaa si heer caalami ah loo joojiyey heshiiskii Stockholm on Persistent Organic Pollutants. Waxaana la sheegay in maafiyada Talyaanigu ay soo daabuleen 60,000 oo dawadaas la joojiyey ah, iyagoo ugu talo goobo kale haddana fudeydsadey xeebaha Soomaaliya, maadaama ay baqasho ka qabaan dhaqdhaqaaqyada badaha ee Reer Galbeedka oo aan rabin in lagu shubo badahooda.

Ta labaadi: Waxa ay tahay in akhristuhu isweydiiyo oo sidee ayey midani xeerarka u waafaqsantahay? Jawaabtu waxa ay noqoneysaa xilligii mashruucan la qorsheynayey waa 1987kiiye ma jirin mana dhaqan gelin wax xeerar/xeerar ah oo arrintaa xakameynata kaas oo adduunku isku raacey. Markiii ugu horreysey ee arrinta laga wada hadlana, waxa ay aheyd 1989kii kala fadhigii 44aad ee Qaramaada Midoobey ee loo dhanyahay (UN General Assembly), isla shirkaas waxa la guddoonsadey resolution-kii lambarkiisu ahaa 44/226 kaas oo lagu xaddidayey “Trafic In toxid and dangerous products and wastes”.

Sidoo kale (Axdigii Basel) oo ah heshiiska ugu weyn ee heer caalami ah ee looguna talo galey in lagu xakameeyo ka ganacsiga iyo daabulidda qashinka suntaa ayaa isna markii mashruuca Yuuraano la hirgelinayey isna jirin. Waxa kale oo la mid ahaa (Axdigii Bomako) oo Midowga Afrika galeen ayaa isna ahaa xilli dambe oo xero iyo fandhaal kala dhaceen. Sidoo kale sharci kasta oo la dejiyaa dal-dalool ma waayo. Gaar ahaan dalka Talyaaniga oo ah udub dhexaadka arrimahan, ayaa dhibtii arrintan oo muuqata, haddana sharciga inta la baalmaro si musuq iyo isdabo marin ah loo waafajinayaa xeerarka dalka Talyaaniga.



rogey mashruuca Soomaaliya. Isagoo Giampiero Sebri ka warramaya soo beddelkii mashruuca ee Soomaaliya wuxuu yidhi: “Waxaa dhacday arrin cajaa’ib ah xilli aan dejinayney hadhaaga Sunta aan ku aaseynay (Saxaraha Galbeed ee Afrika), waxaa naloo sheegay in hadda wixii ka dambeeya aanaan halkaas ku aasi doonin. Taas macnaheedu waxa uu ahaa in qaar xamuulkii Sunta ahaa uu weli saarnaa markabka. Sidoo kale waxaa jirey markab kale oo jidka ku soo jirey afar ilaa shan maalmood oo soo wadey Hadhaaga Sun kale. Markaas labadii markab mid ka mid ah ayaan si ula kac ah ugu dhex dejiyey badda. Markabkii kale waxaa loo leexiyey oo la geeyey Soomaaliya” .

Tusaale ahaan marka qashinka la dhoofinayo shirkadna ma qirato in ay qashin halis ah dhoofinayaan ee waxaa dekedda lagu saara in ay tahay daawooyinka lagu nafaqeeyo ama bacriminta ciida, daawooyin kaalmo bani’aadannimo loo wad iwm. Waxa kale oo xusid mudan in mashruucan markiisii hore loogu talo galey Saxaraha Galbeed, taas oo la rabey in jabhadda halkaas ka dagaalanta hub badan oo ay dawladda marooko kula dagaalamaan la siyo, balse arrintu waxa ay Soomaaliya usoo janjeedhsatey markii dawladda Marooko ay dawladda Faransiika ku qasabtey in la joojiyo suntaas. Sidaasna loogu soo

Giampiero Sebri oo ahaa nin boorsooyinka u qaada oo u khidmeeya Lucino Spada, oo aan hore u soo sheegay inuu dhanna ganacsade weyn ka ahaa dhanna raggii xisbiga Talyaaniga u talinayey uu kamid ahaa, ayaa sebri wuxuu wareysi uu bixiyey (01/01/2000) ku sheegay in Luciano Spada uu kor ka xukamayey nin hantiile ah ee u dhashey Maraykanka asalkiisuna yahay Talyaani oo la dhaho “ Nicholas Bizzio “. Ninkan ayaa waxa uu degganyahay Monaco, shirkadana wuxuu ku leeyahay Talyaaniga, Swizerland iyo Ireland ayaa la sheegay in uu kamid ahaa dadkii lugta weyn ku lahaa mashruuca Yuuraano, isagoo



maafiyada caalamiga ahna xidhiidh wacan la leh. Waxa kale oo ninkan iyo Luciano Spada in badan ka shaqeysan jireen qaarada laatiin America gaar ahaan waddamada Hait iyo Santa Domingo oo ay muddo badan qashinka u dhoofinayeen halkaas oo uu Sebri-na goob joog ka aha. Dabshidkii 1989kii ayaa waxa kooxda curyaamiyey Luciano Spada oo ay geeriyoodey, deedna Sir.Sebri oo halkaas ku agoomoobay ayaa waxa howsha la wareegay hantiilihii reer Mareykan ee Talyaaniga ahaa Nicholas Bizzio. (FG: Sawirka kore waa Gimapiero Sebri)

Waxa kale oo maamulka sare ee kooxda kamid ahaa Guido Garelli oo ka masuul ahaa Polisario(waa saddex aqoonsilihii aynu hore usoo sheegnee) iyo shirkad Talyaani ah oo la odhan “Odino Valperga” oo maraakiibta dhista. Mr.sebri wuxuu booskiisii hore (luciano spada) in nicholas bizzio uu qandaraasyo kaga qaato qashinka ciidamada badda ee mareykanka oo intuu waddanka Talyaaniga keeno haddana usii rari jirey Yurubta bari siiba xudduuda u dhaxeysa Poland iyo Ruushka. Arrintaa sidoo kale waxa caddeysey maxkamad ku taal magaalada Torino iyo weliba Nicholas Bizzio laftiisa oo qirtey inuu mareykanka kasoo qaato qandaraasyo, taas oo uu halkii Ten oo qashin ah uu ka dheefo kun dollar (US 1000 \$ per one ten), iyadoo weliba buu yidhi ay konteenarrada kuu alxamayaan markabkana kuu saarayaan.Waxaana ilaa hadda si fiican u caddeyn kaalinta Hay’adaha sirdoonka Talyaaniga iyo weliba cutubyo ciidanka qalabka sida ka tirsan oo markasta saraakiil iyo dad mas’uul ahiba fadhiyeen miis kasta oo looga doodday mashruuca Yuuraano ama lagu gorfeeyey.



Arrintan in uu ka hadlo Mr.sebri waa ka gaabsadey mar Telefishanka Al-Jazeera wareysanayey in uu magacaabo saraakiishaas isagoo u baqey naftiisa, se laakiin tan keliya ee la hubo sebri-na tebinaayo ayaa ah in siyaasiyiinta ugu waaweyn uguna awooda badnaa ee u sarreeyey dalka Talyaaniga kana mid ahaa xisbigii Hanti Waddaagga ee PSI ay ku lug lahaayeen mashruucan. Mashaariicda ugu cad-cad ee qorshan ka fuiyey Soomaaliya ee waqtigii dawladdii Maxamed Siyaad Barre, waxa kamid ah: dhisidda waddada u dhaxeysa Boosaaso ilaa Garoowe oo ku beegan dhammaadkii sideetamaadkii oo ah xiliga qorshaha la hirgeliyey. Sida ay qireen Mr.sebri, Marocchino iyo nin kale oo u shaqeyn jirey Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Talyaaniga oo mashaariicdani hoos tagto ayaa markii waddadaas la dhisayey waxa loo adeegsadey in lagu aaso qashinkaas.(F.G: Sawirkan hoose waa Muunye)Sidoo kale nin la dhaho Sig. Franco Oliva oo ahaa sarkaal sare oo Wasaaradda Arrimaha Dibada ee Talyaaniga uga shaqeynayey Xamar intii u dhaxeysay 1986kii ilaa 1990kii markaas oo uu ahaa maareeyaha



guud ee mashaariicda kaalmada Talyaaniga ee Soomaaliya wuxuu caddeeyey Mr.Oliva in intii u dhaxeysay 1986kii ilaa 1988kii uu magaalada Xamar kula kulmey Guido Garelli oo uu u sheegay inuu halkaas u joogo uuna sugayo maraakiib xambaarsan qashinka hadhaaga nuclear-ka. Sidoo kale barnaamijka kaalmada dibedda ee Talyaanigu wuxuu ku lug lahaa hubka Soomaaliya ku qulqulayey xilligii dagaalkii sokeeye ka socdey, waxa midaasna loo adeegsadey sida Mr.Oliva ka dhawaajiyeey maraakiibtii barnaamijkaasi u siiyeey Soomaaliya iney u adeegsato kalluumeysiga casrigaa. Maraakiibtaas oo magacyadooda qormooyinkii qeybtii kobaad aynu kusoo sheegnay. Maraakiibtaas oo intii ay dhacdey dawladdii Jaalle Maxamed Siyaad Barre ahaa kuwa uu ku shaqeysto ninka la dhaho Eng. Siciid Muunye, ayaa sida la tuhunsanyahay loo adeegsadan jirey daabulidda hubka sharci darrada ah iyo qashinka, inkastoo uu ninkani beeniyeey midaas sida walaalkiiba u beeniyeey Amiraalyo Saciid Marino oo ahaa taliyihii ciidanka badda ee Soomaaliya, oo isagu ilaa waagaas mar wax laga weydiiyeey aagaas 2000, sheegay in maraakiibtaasi ilaa hadda u adeegto qaranka iyo shacabka Soomaaliyeed nolol maalmeed wanaagsana ay ka helaan kudhawaad laba kun qoys oo Soomaaliyeed.

Haddaba keddib burburkii dawladdii Maxamed Siyaad Barre, ayaa waxa dhammaan dadkii hawlahaan qashin daabulidda ku shaqo lahaa isugu habar wacdeen sidii dar-dar gelin loogu sameyn lahaa mashaariicda sunta, siiba Yuuraano loogana hirgelin lahaa dalka Soomaaliya. Warqad ay sida wada saxiixeen Sig Garelli, Sig. Ezio Scagalone iyo Sig.Giancarlo Marocchino magaalada Nairobi 24kii Juun 1992kii ayaa laga akhriyeey in ay wada hadal la lahaayeen dad Soomaaliyeed si ay uga helaan dhul ay qashinkaas ku aasaan. Sidoo kale waqti ku beegneyd aagga 2000 ayuu Marocchino qirey mar uu wargeysa Famiglia Cristiana u warramayey uuna sheegay in heshiiskaasi dhacey inkasta oo aan hawshaa la fulin buu yidhi mar uu dalka talyaaniga u yimi in maxkammada Roma wax ka weydiiso dilkii suxufiyadii ka tirsaneys Tv-ga RAI ee magaceedu ahaa ilaria Alpi.

FG: Sawirkan hoose waa Giancarlo Marochino

Mr.Marocchino ayaa ah nin aad ugu dhex milmey arrimaha Soomaaliya tan(2000) iyo sideetameeyadii, markaas oo uu kasoo kicitimey magaalada Genova ee uu asal ahaana kasoo jeedo, halkaas oo uu ku lahaa shirkad baabuurta xammuulka ah, kedib waa kacdey shirkadii iyadoo maxkammaduhu weli ku daba jiraan, Keddib xamar markuu kasoo degay wuxuu bilaabey arrimo ku sahabsan darawalnimo, dillaalnimo iyo arrimo la xidhiidha gawaadhida xammuulka ah. Intaas keddib wuxuu fursad shaqo ka helay mashaariicdii kaalmada talyaaniga ee dibadda oo aynu hore usoo sheegnay inuu qandaraasyo badan ka helay. Markii qashinka loo dhoofiyey Nugaal iyo Bari isaguna uu xamar kasoo degay ayaa wax laga weydiiyeey waxa uuna yidhi: “ Anigu konteenarrada daabbulidooda uun baan ku shaqo lahaa Garoowe ilaa Boosaaso ” Sidoo kale ninkani Soomaalida aad buu xidhiidh wanaagsan ula lahaa oo uu u dhex galey xaaskiisuna Soomaaliyad bey aheyd. Keddib markii dambe arrimahaas waa ka dallacay oo wuxuu billaabey inuu si gaar ah ula shaqeeyo Hay’addaha kala duwan ee sirtoonka Talyaaniga iyo siyaasiyiinta waaweyn ee danaha kaleh Soomaaliya. Markii dagaalkii Soomaaliya ka qarxeyna wuxuu gacanta ku dhigey hantidii shirkadihii Talyaaniga ee koonfurta ka qaxey, gaar ahaan kuwii dhisayey waddada u dhaxeysa Afgooye iyo Marka ee loo yaqaanney “Salina” iyo tii naaxinta xoolaha iyo beeraha ee loo yaqaanney “Gizom” oo iyaduna ku taalley aagga Afgooye.



Sida Mr.Sebri sheegay wuxuu Marocchino ahaa ninka u qaabilsan loojistikada mashruuca Yuuraano qeybta Soomaaliya. Waxa uuna sheegay in ay marar badan ku kulmeen dalka Talyaaniga. Markii ugu horreyseyna waxa ay aheyd buu yidhi sideetameeyadii oo aan milano ku kulanay. Wuxuuna warbixin siinayey Mr.Luciano Spada

oo uu u sheegayay inuu jirey Jen.Soomaali ah oo ay aheyd in xoogaa laaluush ah la siiyo, si howluhu u fududaadaan. Sidaa si lamid ah Mr.Sebri wuxuu sheegay in uu mar labaad kula kulmey magaalada Milano 1993kii oo ku beegnayd markaas markii mareykanku ka tarxiiley Soomaaliya, markaan oo uu Marocchino aad u cadheysnaa wuxuuna u hadlayey sida nin lagu tacadiyey oo kale oo ballamihii looga baxey. Wuxuuna Marocchino ku adkeysanayey kulankaas in uu mashruucii Yuuraano fuliyey ayna aheyd wixii la isku waafaqey inuu helo oo uu xaq u lahaa. Isla kulankaas ayaa ninkii ka socdey Hay'adda sirdoonku isagoo u caqli celinaya Mr.Marocchino u ballanqaadey iney iyaguna qeybtooda ka soo bixi doonaan. Waxa iyaguna arrimahan aad ugu lug lahaa maafiyada Talyaaniga gaar ahaan jilibyada Lamonte iyo Fidanzati oo ah laba qabiil oo ka tirsan tol-weynaha maafiyada Talyaaniga. Ugu dambeyn Mr.Sebri oo ah mid isagu wax yar ka abaabuley mashaariicdan ayaa wuxuu go'aansadey inuu caddaalada iyo maxkamadda kala shaqeeyo arrintan, wuxuuna tilamaamey qaar kale oo kamid ah shirkadihii loo adeegsadey fulinta mashruucan Yuuraano, sida: BAUWERK oo xarunteedu tahay dalka Lichtenstein isla markaana laamo ku leh Manrovia(Liberia) iyo shirkada INSTRUMAG oo saldhigeedu yahay Lugano(Switzerland) iyo sidoo kale shirkada BIDATA oo saldhigeedu yahay Switzerland.



Bishii Ogoosto iyo Sebtembar ee dabshidkii 1992ki ayaa Xoghayaha Hay'adda Qaramada Midoobey u qaabilsan arrimaha deegaanka UNEP ee fadhigeedu yahay magaalad Nayroobi, Mr. Mustafa Tolba ayaa wuxuu direy “qeylodhaan” uu kaga digayey shirkado Talyaani ah oo qashin sun ah ku quba Soomaaliya. Mr.Mostafa wuu ka gaabsadey inuu sheego magacyada shirkadahaas isagoo sabab uga dhigey in dad la shaqeeya naftoodu ay halis galeyso. Wuxuuna u jeeday arrimahan waxaa wata taliska maafiyada oo ah taliska guud ee adduunka, xarumo waaweyna ku leh dalka Talyaaniga. Se xilli ku beegan (2000) waxaa suuragashay in la helo warqaddii bayaankii maamulaha UNEP Dr. Tolba iyo mid isla maalmahaas uu soo saaray xafiiska UNEP ee magaalada Nairobi qaybtiisa “Information and Public Relation” iyada oo kooban warkii iyo wixii uu qoray Dr. Tolba taariikhdu markay ahayd 9/9/1992 ayaan qeybta soo socota kusoo bandhigi doonaa. Waxa xusid mudan iyaduna in Dr. Mostafe Kamaal Tolba uu dhintey 28 – Maarso – 2016kii Eebbe ha u naxariistee.

Wuxuu yidhi: ***“Akhbaar ayaa soo gaartay xafiiskayagan UNEP kaasoo la xiriira qashin iyo sun halis ku ah Soomaaliya oo ay ka dambeeyaan shirkado reer yurub ah. Waxaa hadda wadahal noo socdaa annaga iyo waddamada shirkadahaas laga leeyahay. Waqtiga hadda ah ma doonayno inaan faahfaahin ka bixinno arrimahan intaas dhaafsan”*** Isla hadalkiisii ayuu Dr. Tolba haddana dib ugu noqday oo dib u toosiye: ***“Si looga badbaado buun-buunin iyo war aan la hubin ama sax ahayn UNEP waxay xaqiijinaysaa: In shirkado laga leeyahay dalalka Talyaaniga iyo Switzerland ay heshiis la galeen qof la yiraahdo Dr. Nur Elmy Osman oo sheegtay inuu yahay Wasiirka Caafimaadka ee Jamhuuriyadda Soomaaliya. Heshiiskaas baa wuxuu dhigayaa in muddo labaatan sanno ah (1991 – 2011) shirkadahaasi Soomaaliya u dhoofiyaan noocyada kala duwan ee qashinkaas.***

Qiimaha waqtigan (1992) ee heshiiska ayaa ah sideetan malyan oo doollar (US\$ 80M): shixnad kasta oo qashinkaas ah (100 – 150.000 tens) waxaa shirkadahaas ugu jira faa'iido lacageed oo lagu qiyaasay 8 – 10 malyan oo doollar. Shirkadda Swiss-ka ah ayaa iyadu ka helaya shixnadiiba 2-3 malyan oo doollar iyadoo la qoondeeyay in sannadkiiba la dhoofiyo nus-malyan ten oo sun ah (500.000 tons). Waxaa hadda loo dirayaa Soomaaliya wax u dhow hal malyan oo ten oo qashinkaas ah halka dadkii Soomaalidu gaajada iyo dagaalka baabi'iyeen: Shirkad Swiss ah ayaa la sheegay inay ku hawllantahay dhismaha labo markab oo ay saaranyihiin qalabka qashinka lagu gubo (incinerators).

Maraakiibta waxaa loo adeegsanayaa daabulista qashinka; Ilaa hadda ma hubno inta qashinkaas Soomaaliya gaadhay waxaase aad loo tuhunsanyahay in xeebaha lagu qubay; Shil kale oo kaas ka duwan ayaa ka dhacay Woqooyiga dalka (Somaliland) halkaas oo maqsin ay ku jireen 81.200 litir oo sunta cayayaanka lagula dagaallamo oo dhacday uu dab ku qabsaday lana filayo inay halis ku hayso biyaha dadka iyo xooluhu cabbaan oo awalba gobolka ku yaraa. Waxaannu hadda ka tashaneynaa sidaan sahan degdeg ah Soomaaliya ugu diri lahayn.”

Waxa ay ku qaadatey muddo shan dabshid ah in ay hay’adda UNEP fuliso ballantii maamulaheeda Dr. Mostafa Kamal Tolba uu ballanqaadey, walow sida maqaalkiisa ka muuqatey uu ballanqaadey in ay si deg deg ah sahan iyo baadhitaan ugu dirayaan Soomaaliya, haddana se ugu dambeyntii UNEP waxa ay dabshidkii 1997kii u dirtey xeebaha Soomaaliya qaarkood dad Cilmi-baadhayaal ah oo uu hoggaaminayey nin lagu sheegay bare hore oo wax uga dhigi jirey Jamacadda Ummadda Soomaaliyeed gaar ahaan maadada kimistariga oo magaciisa la dhaho Prof. Mahdi Geeddi Qayad oo mudo bil ah kusoo wareegay xeebaha badweynta hindiya ee Mudug ilaa Jubada Hoose oo arrimo yaab badan soo tebiyey. Prof. Mahdi oo kamid ahaa la taliyayaasha Hay’adda Qaramada Midoobey u qaabilsan xagga deegaanka ee UNEP, wuxuu shaqadiisii baadhitaan iyo xog raadiska aheyd bilaabey 10kii May 1997kii. Gaba-gabadii baadhitaankaas oo lagu soo sameeyey gobollo badan oo ka mida Soomaaliya, gaar ahaan nawaaxiga xeebaha badweynta hindiya, waxaa lagu soo tebiyey wareysiyo iyo raad-raacyo aan yarayn.

Laba arrimood baase xusid gaara mudan: Dhimashadii nin kalluumaystaa oo ku dhintay xeebta Baraawe. kaddib markuu furay bac badda ka soo caariday oo aan la aqoon waxa ku jiray deedna wixii ku jiray ay ninkaas soo gaadheen. Arrinta kale waxa ay la xidhiidhaa haan weyn (tank) uu dhererkeedu dhanyahay illaa 6mitir oo iyana markeeda xeebta badweynta hindiya ka soo caariday ilaa haddana(2000) taal meel u dhexaysa Cige iyo Mareeg. Waxa wax cajiiba oo in badan la isweydiyo oo lala yaabo noqotey in Hay’adda UNEP ay qarisey natiijada kasoo baxdey shaqada uu qabtay team-ka Mr. Geeddi, laakiin suxufiyiinta Famiglia Cristiana oo iyaguna baadhitaanka sameynayey ay u suuro gashey in ay nuqul(copy) ka helaan report-kii shaqadaas laga diyaariyey oo ay ku jireen sawirro iyo muuqaalaba.



Sidoo kale suxufiyiinta Talyaaniga waxa ay xaqiijiyeen jiritaanka goobo fara badan oo kamid ah Soomaaliya oo dabshidyadii sagaashamaadkii iyo ka horba lagu aasey ama se lagu daadiyey sun aad u halis ah sida ka muuqata jaantuska khariirada goobaha sunta lagu aasey. Dhulka koonfurta waxa ugu muhiimsan Jammaame ee aagga Kismaayo ilaa naxaawiga xeebaha Marka iyo Muqdisho. Sida ay warbixintooda ku caddeeyeen 19kii Ogoosto 1996kii. Mr. Cali Mahdi Maxamed oo ahaa madaxweynihii Soomaaliya xiliyadii dagaalada sokeeye (27 – Janaayo – 1991 ilaa 03 – Janaayo 1997) ayaa isna si rasmi ogolaansho u siiyey nin Talyaani ah oo kamid ah kuwa aan hore usoo sheegnay lana yidhaahdo Ezio Scaglione si uu uga aasaaso meesha la yidhaahdo Ceel-Baraf rug lagu keydiyo iyo warshad sii kala hufta qashinkaas sunta ah ee dibedda laga soo waarido. Goobaha qashinkaas si gaar ah loogu duugey waxa kamid ah bay dhaheen: Jawhar, agagaarka waddada Boosaaso ilaa Garoowe iyo dhulka u dhexeeya gobolada Bari iyo Sanaag, intaas oo berriga ah waxa sii dheer kuwa badda oo ay kalluumeysatadu arkeen. Waxaa xusid mudan iyaduna hadal uu yidhi Mr. Halifa Omar Darameh oo isna u hadlay UNEP oo ahaa ***“Arrimahani waa kuwo welwel weyn nagu haya cawaaqib-xumada ka iman kartana ma aha keliya mid soo raageysa ee waa mid deg deg ah, qorshahayaguna waxa uu ahaa in aan la dagaallano budhcadnimada lagu hayo dhulka iyo xeebaha Soomaaliyeed ee baylahda ah, nasiib darro se buu yidhi lama ilaalin karo 3300km oo xeeb ah.”***



(c) SomaliTalk.com



(c) SomaliTalk.com



(c) SomaliTalk.com

Qeybta 3aad: Cali Mahdi iyo Yuuraano

Afar dabshid kaddib markii mashruucii Yuuraano-2 jaaha lagu saaray Soomaaliya, ayaa Cali Mahdi Maxamed oo ahaa madaxweynaha Soomaaliya waqtigaas(1991-1997), waxa uu mid ka mid ah dadkii xidhiidhka la lahaa Mashruuca URANO oo la dhaho Prof. Ezio Scaglione. Waxa uu u saxiixay warqad isaga oo sida warqadda ku cad u ansixiyey in dalka Soomaaliya laga sameeyo goob lagu aaso sunta Nuclear-ka ah. Aqalka Baarlamaanka ee dalka Talyaaniga ayaa Baadhitaan xooggan oo uu ku sammeeyey sunta halista ah ee lagu aasey dalka Soomaaliya iyo xidhiidhka ka dhexeeya dalkii wariye Alpi & sawir-qaadaheedii Miran Hirovatin, ayaa intii baadhitaankaasi socdey guddi arrintaas loo xilsaaray waxa ay 7dii September 2005tii wareysi dheer la yeesheen Cali Mahdi Maxamed. Waxaana taas garab socdey xog farabadan oo ay soo uruurriyeen Hay'addaha Sirdoonka Talyaaniga ee "SISDE" (oo ah madaniga) iyo SISMI (oo ah militariga). Cali Mahdi Maxamed waxa ugu horayn wax laga weydiiyey xaaladii hore ee Muqdisho hore iyo dambeytaba, taas oo dhinac kasta taabaneysa. Kaddib markii lagu yidhi aan ka hadallno ninka la dhaho "Giancarlo Marocchino", waxa uu Cali Mahdi Maxamed durbadiiba sheegay in xaaska Marocchino ay tahay gabadh uu dhalay qof qaraabo la ah isaga. Kaddib ayaa la weydiiyey: Waa maxay xidhiidhka aad la lahayd Mr. Marocchino? Ma xidhiidh Ganacsi, Siyaasad, Akhbaar, Saaxiibtinimo, Qaraabanimo ama faa'ido wadaag? Waxa uu Cali Mahdi Maxamed ku warceliyey: "Xidhiidh saaxiibtinimo maadaama oo uu ku noolaa aagga."



Markii la weydiiyey cidda uu ninkaasi u shaqayn jirey? Cali Mahdi Maxamed waxa uu ku jawaabey: "Inta aan ka ogahay waxa uu ahaa gaadiidle wax rara. Haddaba ninkan la dhaho Giancarlo Marocchino oo hore-na aynu uga soo hadallney waa nin dhalashadiisu tahay Talyaani oo intii u dhaxeysay 1992kii ilaa 1996 ku noolaa degmada Kaaraan ee magaalada Muqdisho isagoo difaac ka haystey Cali Mahdi Maxamed. Marocchino waxa uu lahaa gawaadhi waaweyn iyo aaladdaha lagu qodo godadka, taas oo loo malaynayo in uu ku qoday godad lagu aaso Sunta halista ah. Giancarlo Marocchino waxaa la sheegay in uu ku lug-laahaa ama se qeyb uu ka ahaa dhismihii dekedda Ceel Macaan oo ku taal xeebta u dhaw Muqdisho. Xilligii dekeddaas la dhisayey ayaa looga shakisan yahay in halkaas (aagga u dhexeeya Warsheekh ilaa Mareeg) lagu duugey hadhaaga qashinka sunta halista ah, sidaan hore-ba usoo tilmaamey middaas qormooyinkii hore.

Waxaa jira warbixinno muujinaya in Giancarlo Marocchino uu Muqdisho gurigiisa ka dhigtay ilaa dabshidkii 1984kii, xilligaas oo uu ka soo cararay Talyaaniga eedayn la xidhiidha is daba marin cashuurta awgeed. Waxaana uu guursaday haweeney Soomaaliyeed oo ka soo jeeda magaalada Muqdisho. Waana ninka warbixinno badan ay farta ku fiiqeen in uu ka mid yahay dadka Sunta ku aasa Soomaaliya. Kaddib Guddiga Baadhitaanka ee Baarlamaanka Talyaaniga ayaa waxa ay Cali Mahdi Maxamed weydiiyeen in xidhiidh shaqo ay dhex martay isaga iyo Muunye Siciid Cumar (Eng.Muunye). Waxaana uu ugu jawaabey: "In aan weligood xidhiidh dhex marin isaga iyo Muunye." Waxaa markaas la weydiiyey in ay jiraan warar la isla dhex marayey Soomaaliya dhexdeeda, oo ah in dalkii wariyayaashii Talyaaniga ay salka ku hayaan qorshihii wariyayaashaasi ay ku tageen Boosaaso ee ay ku booqdeen Markabka "21-ka October" ee kalluumaysiga oo ay qabsadeen maleyshiyaad ka tirsan jabhadda SSDF. Waxa kale oo wariyayaashu soo uruurriyeen xog ku saabsan sidii markabka loo qabsaday iyo sida khaldan ee loo adeegsado mashruuca kaalmada ee dawladda Talyaaniga", waxaana Cali Mahdi Maxamed la weydiiyey in uu arrimahaas maqlay. Cali Mahdi waxa uu ku warceliyey: "In uu maqlay in Eng. Muunye uu bixiyey lacag dhan

\$600,000 (lix boqol oo kun oo doolar) si loogu siidaayo Markabkaas.” Cali Mahdi Maxamed waxaa la tusay warbixin ay qortay Hay’adda sirdoonka ee SISDE 3-dii September 1997kii, qoraalkaas waxaa ka mid ahaa: “Maarso 1993kii in ay jireen ururro dembiilayaal caalami ah oo ka hawl gala dhulal caalami ah, kuwaas oo daabula waxyaalo sharci darro ah. Ururradaas oo xidhiidh la leh Wasiirkii Arrimaha Dibadda ee madaxweynihii Soomaaliya Cali Mahdi Maxamed oo magaciisu yahay “Xaaji Maxamed Xaashi Cigaal”. Arrintaas Cali Mahdi waa ku gacan saydhay. Waxaa markaas la weydiyey in uu ogyahay in Eng. Muunye la kulmay King Kong (oo ku magac dheer Boqorka). Waxa uu Cali Mahdi ku jawaabey: “Haa, waa ogahay”. Waxaa markaas la weydiyey in uu ka war hayo in weriye Ilaria Alpi ay Boosaaso waraysi kula yeelatay Boqorka.

Waxa uu Cali Mahdi ku jawaabey “kama war hayo midaas”. Waxaa markaas la weydiyey: waxaad ka warhaysaa in hub lagu qaaday maraakiibta SHIFCO ee Eng. Muunye, kamana war haysid arrintan waraysiga miyaa? Waxa uu yidhi “Maya.” Waxaa markaas haddana la weydiyey: Sow warqad umaad qorin Safiirkii Talyaaniga u qaabilsanaa Soomaaliya adigoo ku weydiisanaya in maraakiibta laga soo wareejiyo Eng. Muunye, oo uu maamulo ninka la dhaho: Maxamed Xuseen Mooge. Cali Mahdi Maxamed arrintaas wuu qirey. Cali Mahdi Maxamed oo haddana markale waxa la weydiyey sunta halista ah ee ku duugan Soomaaliya, gaar ahaan waddada u dhaxeysa Boosaaso iyo Garoowe, waxa uu ku jawaabey: “Ma doonayo in aan ka hadlo jidka u dhexeeya Garoowe iyo Boosaaso, sababtoo ah waxaa arrintaas ku tacaluqdaa xilligii dawladdii Maxamed Siyaad Barre.



Waxa uuna intaas ku darey “Soomaalidu meel dheer ayey wax ka uriyaan oo waxay leeyihiin san si fiican wax u uriya, wayna arki lahaayeen haddii wax jaadkaas oo kale ah la dhex gelin lahaa waddooyinka Soomaaliya. Ma heli kartid xitaa hal qof oo Soomaali ah oo arrintaas ka hadlaya.” Yaab badanaa! Indho adkaa. Waxaana uu Cali Mahdi Maxamed intaas raaciyey “Waxaa la igu eeddeeyey in aan lacag ka qaatay hadhaaga qashinka ee lagu daadiyey badda caalamiga ah oo aan anigu ansixiyay. Waa bad caalami ah, mana ilaalin karno xitaa 50km oo xeeb ah, ma haysanno maraakiib, ma haysanno wax aan ku ilaalino, sidaas daraaddeed waxaan aaminsanahay in dhaammaan arrimahaasi ay yihiin waxba kama jiraan, waa arrin la dhoobdhoobay.” Laba dooraba boodhka ayuu Cali Mahdi isku qariyey, haddii uu lacagta iska bari yeelayo waa gaar, haddii uu leeyahay suntu waa jirtaa in lagu shubey badda Soomaaliyeed oo waxba kama qaban karno oo itaalkeen maahana waa gaar.

Kaddib Cali Mahdi Maxamed waxa la weydiyey: Ma garanaysaa ninka lagu magacaabo Luciano Spada? Waxa uu ku jawaabey: “Maya”. Ma garanaysaa Nicholas Bizzio? Maya, ayuu ku jawaabey. Ma garanaysaa Enzo Sacchetto? Maya Ma garanaysaa Guido Garelli? Maya.. Ma garanaysaa Mashruuca “URANO”? Weligay ma maqal ayuu ku warceliyey. Laakiin Giancarlo Marocchino waxa uu sheegay in uu la xidhiidhay dadka aan xusnay, gaar ahaan Garelli. Miyaadan aqoon Garelli? ayaa lagu yidhi Cali Mahdi oo uu ku jawaabey Anigaa?.... maya, ma maqal weligey. Miyaan Garelli loo ansixin sun ku duugidda Soomaaliya?, ayaa la weydiyey. “Maya, sidee ayaan taas ugu samayn kara dalkayga” ayuu yidhi Cali Mahdi. Markaas ayaa Cali Mahdi Maxamed waxaa la tusay warqad uu ku saxiixan yahay magaciisa oo uu u saxiixay ninka lagu magacaabo Prof. Ezio Scaglione. Warqaddaas oo muujineysa in uu ansixiyey goobo ama meelo ka mid ah Soomaaliya in lagu aaso hadhaaga qashinka sunta halista ah. Waxaana la weydiyey in warqaddaas uu isagu qoray 19 August, 1996. Taasna Cali Mahdi Maxamed waa ku gacan saydhay. Cali Mahdi waxa uu sheegay in warqaddaasi tahay been abuur la dhoobdhoobey, shaqo iyo shuqulna uusan ku laheyn arrintaas. Markaas ayaa waxaa la xusuusiyey in ay ku saxiixan tahay calaamadda Jamhuuriyadda Soomaaliya oo saxiixiisu ku yaal. Waxaana la weydiyey in uu garanayo ninka lagu magacaabo

Dr. Nuur Cali Gacal ? Waxaa Cali Mahdi Maxamed ku jawaabey “Cali Gacal waan garanayaa”. Haddaba ayaa lagu yidhi “Nootaayada Dr. Nuur (Cali Gacal) ayaa xaqiijisay in saxiixa ku qoran warqadda uu yahay saxiixaaga.” Waxa uu markaas Cali Mahdi yidhi “Maya, ma aha arrin aan samayn karo.” Waxaa markaas loo akhriyey wixii ku qornaa warqadda. Warqaddaas oo ku qorneyd Af-Talyaani oo SomaliTalk.com u tarjumtey Af-Soomaali jaantusyada halka hoose ka eeg.

SOMALI REPUBLIC

7/5

OFFICE OF THE PRESIDENT

REF. NO. IS/KM/4-195/1996

MOGADISHU 15/8/1996

IL PRESIDENTE

VISTO La Necessita d'istituzione e la Creazione di sei impianti di smaltimento per la trasformazione di rifiuti.

VISTO I rapporti di fiducia e di stima che nutriamo verso il Cittadino Italiano Prof. Elio Scaglione già Console Onorario della Repubblica Somalia.

DIRETO QUANTO SEGUE

In Ali Mahdi Mohamed, Presidente Ad Interim della Repubblica Somalia, con il presente Decreto Presidenziale emesso in Mogadishu oggi 19 Agosto 1996, viste le normative attualmente in Vigore sul Territorio della Repubblica Somalia.

AUTORIZZO

La Creazione di un Impianto di Smaltimento per la Trasformazione di Rifiuti che verra ubicato in zona Localita, una e riceverlo in esecuzione ai Principi di Sicurezza Idrogeologica ed Ambientale. Concedendo nel contempo la piu totale ed ampia autorizzazione allo sbarco, transito e al definitivo deposito di dette sostanze sul territorio della Repubblica Somalia, e pertanto Autorizzo il Prof. Elio Scaglione a realizzare il menzionato Programma.

Il Presidente Ad Interim
della Repubblica Somalia
S.E. Ali Mahdi Mohamed

7/5

**JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA**

TIXRAAC: JS/XM/4-189/1996 MUQDISHU: 19/8/1996

MADAXWEYNAHA

MARKAAN ARKAY: Baahida Loo Qabo Hirgelinta Xarun/Goob lagu Kaydiyo oo lagu Agaasimo Haraadiga Qashinka.

MARKAAN ARKAY: Xiriirka Is-aaminaadda iyo Wanaaggu ku dheehan yahay ee naga dhexeeya Muwaadinka Talyaaniga ah Professor Ezio Scaglione oo hore loogu sharfay Latalinta Jamhuuriyadda Soomaaliya.

WAREEGTADAN SOO SOCOTA

Aniga, oo ah Cali Mahdi, Madaxweynaha Kumeel-Gaarka ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya, waxaan Wareegtadan aan Muqdisho ka soo saaray maanta, 19 Agoosto 1996, kaddib markii aan tixgeliyay Xeerarka/Qaanuunka xilligan la joogo ka jira Dhulka Jamhuuriyadda Soomaaliya.

WAXAAN ANSIXINAYAA

In la sameeyo Xarun lagu Kaydiyo oo lagu Agaasimo Haraadiga Qashinka, Xaruntaas oo laga hirgelin doono goobo ku haboon, taas oo noqon doonta xarun la waafajiyo xeerarka ammaanka iyo xeerarka bay'adda/degaanka ee la xiriirta biyaha-dhulka/Juquraafi ahaa, iyadoo loo agaasimayo adeeg si aad ah u dhamaystiran oo loo ansixiyey, oo leh ah meeshii lagu soo dejin lahaa, meeshii la soo marin lahaa marka la soo qaadayo iyo ugu dambayn meesha maadooyinkaas (xamuulkaas) lagaga kaydinayo Dhulka Jamhuuriyadda Soomaaliya, sidaas daraadeed waxaan u ansixiyey Professor Ezio Scaglione in uu Hirgeliyo Mashruucan (kor ku) Xusan.

Waxaa saxiixay: Madaxweynaha Kumeel Gaarka ah
Ee Jamhuuriyadda Soomaaliya
Mudane: Cali Mahdi Maxamed

Intaas keddib waxaa kale oo Cali Mahdi wax laga weydiiyey in uu garanayo ninka lagu magacaabo Giorgio Comerio? Waxaana uu ku jawaabey “Maya, ma garanayo”. Markaas ayaa su’aasha lagu celiyey oo la weydiiyey in uu weligiis maqlay qorshaha ah ayadoo la adeegsanayo wheelka loo yaqaan Torpedoes (oo asalkii loogu talo galay in gantaalada lagu xambaaro) oo ay ka buuxdo sunta halista ah in lagu duugey badda Soomaaliya? Cali Mahdi Maxamed intaas keddib inta uu qoslay ayuu yidhi: “Arrimahaas waxaan ka ogaadey Qareenkayga.”

Waxa aad xusuusataa qaybihii hore ee qormooyinkan in Ezio Scaglione, oo ah ninka uu Cali Mahdi u ansixiyayey warqadda sare, uu xidhiidh la leeyahay Mashruucii URANO. Sidoo kale-na uu kamid ahaa asaasayaashii mashruucaas iyo Giorgio Comerio. Waxaadna dib u xusuusataa hadalkii Giampiero Sebri ee ahaa: “Ururrada sunta aasa weli si firfircoon ayey u hawl galaan. Haddii aysan weli si toos ah sunta u aasin, waxa ay u hawl-galaan sidii iyagoo ah la taliyayaal.” Maadaama uu Ezio Scaglione uu ahaa la taliye dawladdu Talyaanigu usoo dirtey Cali Mahdi.

Qeybta 4aad: Ilaria Alpi iyo Dilkeedii

Ilaria Alpi waa weriye Tlyaani ah oo u shaqeyn jirtey Tv-ga RAI ee dalka Talyaaniga. Waxa ay dhalatey 24kii bishii May ee sannadkii 1961kii. Waxa ay Soomaaliya timid bishii maarso 1994kii markaas oo ay baadhitaan ku wadey hubka sharci darrada ah ee maraakiibta dawladda Talyaanigu ugu deeqdey Soomaaliya ee lagu daabulo iyo sidoo kale hadhaaga sunta qashinka ah ee lagu aaso dalka Soomaaliya. Waxa ay ugu horreyn kusoo degtay magaalada Boosaaso halkaas oo ay kulamo dhowr ah kula yeelatey dad kala duwan. Kaddib waxa ay uga sii gudubtey magaalada Muqdisho, halkaas oo lagu diley 20kii Maarso 1994kii iyada iyo sawir qaadaheedii Miran Hrovatin. Maarso 1994 Soomaaliya waxa ay ku dhexjirtey dagaal. Waxa ka dhex jirey jabhado, dawladdii waa ay burburtey. Waxaana magaaladu u kala qaybsanayd laba qaybood oo uu kala qaybinayey waxa loo yaqaaney “Khadkii Cagaarnaa” oo ay ilaalin jireen ciidamo Qaramada Midoobey ah.



Alpi hooyadeed waxa ay sheegtay “in asal ahaantii (Alpi iyo Miran) ay Soomaaliya u tageen in ay war ka soo qoraan ka bixitaanka ciidamada Talyaaniga. Waxaana jira sida aan ka ogaadey qoraalkeedii in sidoo kale ay doonayeen in ay dhamaystiraan baadhitaan socdey” ayey tidhi mar uu TV-ga Aljazeera waraysi la yeeshay labada waalid ee weriyaha la diley (Alpi), iyaga oo sheegay ilaa hadda in aysan garanayn sababtii loo diley gabadhoodii.




Dilka weriyaha ayaa u dhacey in ugu horeyn markii ay ilaria Alpi wacdey hooyadeed kaddib ayaa ay ka tageen Hotel Saxafi iyagoo uu la socdey waardiyahooda Maxamed Nuur Aadan iyo darawalkoodii Cali Maxamed Cabdi. Waxa ayna ka gudbeen “Khadii Cagaarnaa” iyagoo u hayaamey dhanka Waqooyiga magaalada ilaa ay gaadheen Amaana Hotel.

Markii ay Hotel-ka kasoo laabteen waxa soo daba galey gaadhi ay saaranyihiin todoba nin, waardiyahoodii Maxamed Nuur Aadan oo markii dilku dhacey u warramey warbaahinta ayaa sheegay in “Qorigiisa ay xabaddu ku mirgatey oo uu u dhici waayey, fursadaas xabaddu iga istaagtey darteed ayey iga faa’ideysteen, baabuur dhicid ayeyn u socdeen, darawalka ayeyna rabeen in ay dilaan markaas bey dileen gaalada.” ayuu yidhi.

Domenico D’amati oo ah Qareenka dacwaddeeda ayaa tilmaamey in ay shirqool iyo dabin loo maleegay tahay weriyadda qaabka loo diley maadaama markii ay muqdisho timid Waqooyiga loogana yeedhay oo ay ka talowdey “Khadkii Cagaarnaa” ee Qaramada Midoobey ilaalinayeen. Waxa kale oo uu yidhi: “ Booliska Soomaaliya baadhitaan ay ku sameeyeen arrintan ay ku muujiyeen in Ilaria Alpi loo soo direy Telephone si dabin ahna loogu yeedhay in ay timaado dhanka Waqooyiga magaalada.” Waxa se layaab noqotey in weriye Ilaria Alpi iyo sawir qaadaheediiba labadaba xabad looga dhuftey madaxa qeybtiisa dambe, halka waardiyihii iyo darawalkiina nolol looga tagey. Qareenka qoyska Ilaria Alpi ayaa wuxuu yidhi: “Waxa la sheegay in kuwii dilka geystey ay weerarka soo qaadeen kaddib markii uu xabad ku ridey waardiyyuhu, haseyeeshee wax xabad ah kumey ridin waardiyyaha, halka ay xabadda gaadhiga uga soo dhex rideen laba weriye, taas oo ay aheyd sida la filayey in waardiyyaha ay xabadeeyaan ama labadoodaba.” Qareenka Xaashi Cumar Xasan(waa ninka loo xidhey dilka ilaria Alpi) oo la

waraystay ayaa sheegay: ” Fikirka in la dilo labada weriye waxa uu asalkeedu ka yimid Talyaaniga ee kama iman Soomaaliya, halka Soomaaliya waxa keliya oo ay fuliyeen amarka/qorshaha.” Dhimashadii weriyaayasha kaddib waxa la helay xogo iyo akhbaar tibaaxeysa in ay baadhitaano ku dabo jireen tusaale ahaan qoraal ah sida tan: “1400 billion liire: Xaggee Ku dambeysey Lacagtan Xad Dhaafka ah”, ayaa kamid ahaa qoraal ku qornaa buug(note book) ay wadatey Ilaria Alpi, qoraalkaas oo muujinaya in ay daba socotey sida qaldan ee loo adeegsadey mashruuca deeqda Talyaaniga ee Soomaaliya.

"1400 miliardi di lire: dove è finita questa impressionante mole di denaro?"
"1400 billion liire: Xaggee ku dambeysey Lacagtan Xad Dhaafka ah"



Qormadii Alpi oo muujibaysa in ay daba joogtey meesha martay lacag dhan 1400 Billion oo liire.

Maxamed waxa uu Alpi u sheegay in "Soomaaliya ay qiyaastii 98% ay nabad tahay, meesha keliya ee ay dhibaato ka jirtaana ay tahay meesha uu joogo Gen. Maxamed Faarax Caydiid oo ah 3-km oo keliya oo ay ku urursan yihiin Caydiid iyo ciidankiisu." Waxa markaas ilaria alpi ku tidhi Cali Mahdi: " Haddii taasi ay run tahay oo uu joogo 3-km oo keliya sidee ayey ku dhici weydey in ciidamada adduunka ugu xoogga weyn ay nabadayn kari waayeen? Waxaana uu ugu jawaabey: " Taasi waa arrinta aanaan fahmi karin, ciidamadu waxay ku yimaadeen qorshahooda" Cali Mahdi waxaa kale oo la weydiiyey waxa uu ka odhanayo warbixintii ay sirdoonka Talyaaniga ee "SISMI" qoreen 21 Maarso 1994kii oo ahaa: " Xaaska Cali Mahdi oo la dhaho "Nuurto", markii ay la kulmeen waxay sheegtay aragtideeda ku aadan dilkii labada weriye in uu ahaa mid ay ka dambeeyeen Kooxaha Islaamiga ah ee xagjirka ah si ay u sameeyaan carqalad ku aadan Reer Galbeedka." Waxay Nuurto intaas ku dartay "in weriyayaasha la daba joogey ilaa markii ay 17 Maarso 1994kii ka soo laabteen magaalada Boosaaso.

Haddaba weriye ilaria Alpi ka hor intii aan la dilin waxay Muqdisho wareysi kula yeelatay Cali Mahdi Maxamed. Waraysigaas waxaa laga sii daayey Telefishanka dalka Talyaaniga ee RAI markii la diley weriyaasha 1994kii. Waxayna su'aashii u horreysey ee ay weydiisay ahayd: "Madaxweyne ma ii sharraxi kartaa sida ay tahay xaaladda Waqooyiga Muqdisho?" Cali Mahdi waxa uu ugu jawaabey: "Waqooyiga Muqdisho dhammaan waa deggan yahay, mana jiraan wax dhibaatooyin ah." Cali Mahdi



Digitized: SomaliTalk.com

Waxa ayna intaas ku dartey in dadka dilka geystey ay ka yimaadeen Waqooyiga Muqdisho iyo in dad badan oo Soomaali ah ay lacag ka qaataan Xagjirayaasha iyo Maamulka Somaliland, si loo carqaladeeyo nabadda Muqdisho." Cali Mahdi waxa uu hadalkaas kaga jawaabey: " In 1994kii ay Nuurto ahayd xaaskiisii, lakiin hadallada ay ku hadashay ay ahaayeen waxba kama jiraan oo ay yihiin mala-awaal" Waxaa markaas la weydiiyey "Maxaa sababay in xaaskaagii ay sidaas tidhaahdo?". Cali Mahdi waxa uu yidhi: "Ma garanayo, anigu waxaan ahay Cali, iyaduna waa Nuurto." Si kastaba ha ahaatee hadalkaasi run ma ahan, ma aha run," ayuu hadalka ku adkeeyey. Waxa markaas Cali Mahdi Maxamed la weydiiyey in uu ka warhayo in dawladda Talyaanigu ay baadhitaan ay samaysay iyo in isaga lagala soo xidhiidhay Xarunta Dhexe ee Booliska Talyaaniga ee magaalada Udine. Waxa uu ku jawaabey Cali Mahdi" "Waxaan u malaynayaa inaan arrintaas ka maqlay Qareenkayga, Stefano Menicacci". Markaas ayaa la weydiiyey "Adiga, Boqor, Muunye iyo Muunye walaalkiis (Saahid Marino) in aad lug ku leedihiin dilkii (weriyayaasha). Maxaad arrintaas ka dheheysaa?" Cali Mahdi waxa uu si degdeg ah

ugu jawaabey " Taasi waa been!, waana ka xumahay in aan idhaahdo, sababtoo ah waa Boqor Daarood oo ma joogi karin Muqdisho, daarood waa ka baxeen (Muqdisho). Muunye waxa uu cararay ka hor Maxamed Siyaad Barre waxaana uu jiraa Yemen iyo aaggaas."

Waxa kale ee jirta in Xaashi Cumar Xasan uu yahay ninka keliya ee loo qabsadey dilka weriye Ilaria Alpi iyo sawir qaadaheedii Miran Hirovatin. Iyadoo dadka dilka geystey ay 7nin ahaayeen. Haddana keligii baa loo qabsadey, kaas oo ilaa muddo 10 dabshid ah ku jira Xabsi ku yaal Waqooyiga Talyaaniga. Qareenka Xaashi waxa uu yidhi: " Xaashi Cumar Xasan waxa uu ka mid yahay dhibanayaasha ay sida xun ula dhaqmeen ciidamadii Talyaaniga ee ku sugnaa Soomaaliya, markii uu yimid magaalada Rooma waxa uu ogaadey in lagu oogey dacwadda dilka weriyaashii." Xaashi Cumar waxaa dembigaas lagu xukumay kaddib markii ay ku markhaati fureen laba qof oo sheegay in uu ka mid ahaa kuwii dilka geystey. Labadaas qof waxay ahaayeen nin la dhaho Cali Maxamed Cabdi oo ahaa darawalkii ilaria Alpi iyo ninka lagu magacaabo Axmed Cali Raagge oo loo yaqaan "Jeelle" oo ku andacoodey in uu goobta dilku ka dhacay uu joogey.



Haddaba dabshidkii 1997kii ayaa waxa Soomaaliya loo direy ergay gaar ah oo kasocdey dawladda Talyaaniga, waxaana la sheegay in uu wadey hanti badan. Waxa uuna ergeygu Talyaanigu la xidhiidhay Axmed Cali Raagge "Jeelle ". Waxaa markaas la xusey in Jeelle uu lasii xidhiidhay Xaashi Cumar Xasan waxaana uu u soo bandhiggay qaar kamid ah lacagta si uu Xaashi u qirto dilka weriyayaasha. Waxa halkan ka muuqata in marka lacagta la siinayo Jeelle uuna ka codsanayo Xaashi in uu qirto dilkaas, uu ka dambeeyo arrintan ergayga gaarka ah

ee dawladda Talyaaniga oo rabta in ay soo koobto dhacdada. Balse waa halkii Soomaalidee "Sakaaro xaar muuqda ayey aas-aastaa". Qareenka Xaashi waxa uu yidhi: "Ka hor intii uusan u soo dhoofin Talyaaniga, waxaa Xaashi u yimid Jeelle oo u ballan qaaday lacag si uu qirto dilkii weriyaasha." (Sawirka sare: Xaashi waa ninka dhexda ku jira, ninka soke-na waa Qareenkii Xaash)

Xaashi markii uu diidey lacagta uu Jeelle u soo bandhiggay, waxaa Xaashi si xeeladaysan looga gacan haadiyey Talyaaniga. Waxaa lagu casuumey in uu ku markhaati furo ciidamadii Talyaaniga ee ka tirsanaa Qaramada Midoobey ee lagu eeddeeyey in ay isaga (Xaashi) si xun ula dhaqmeen markii uu tegey Talyaaniga, daqiiqadii uu diyaaradda ka soo degey ayaa la dhigay xabsiga isagoo loo xiray dilkii weriyaashii. Jeelle ayaa ku adkeystey in Xaashi uu ka mid ahaa dadkii dilka u geystey weriye Alpi iyo sawir-qaadaheedii. Waxaa sidoo kale Xaashi ku adkeystey Cali Maxamed Cabdi (darewalkii) kaas oo isna la diley markii uu ku laabtay magaalada Muqdisho. (FG: Sawirkan sare darawalkii (shishe/midig) iyo waardihihi (sawirka soke). Waxaa markaas su'aal ka timid in Jeelle yahay qof la rumaysan karo. Jeelle waxa uu yidhi: "Waxaan joogey goobta dilku ka dhacay markii rasaasta la furay."



Waxaana uu ku andacoodey in uu yahay qofka ka muuqda sawirka hoose dhanka bidix (oo laga qaaday goobtii dilku ka dhacay). Laakiin Qareenka Xaashi ayaa yidhi: "Sawirro la qaaday waxay caddeeyeen in qofka goob-joogga ahaa (oo sawirkii xilligaas la qaaday ka muuqda) uu ahaa ninka lagu magacaabo Cali Xasan Cosoble, ee sawirkaasi uusan ahayn Axmed Cali Raagge "Jeelle." Haddii sawirkaasi uusan ahayn Axmed Cali Raagge "Jeelle", arrintu waxay noqoneysaa in xukunka lagu ridey Xaashi Cumar Xasan uu ku dhacay si khaldan oo ah hal markhaati oo keliya, kaas oo ahaa Cali Maxamed Cabdi oo isagiina la diley kaddib markii uu ku adkeystey Xaashi Cumar Xasan in uu dilku ka dambeeyey."



Waxa sidoo kale xusid mudan in Qareenka uu ku dooddey Xaashi Cumar Xasan uusan joogin Muqdisho maalintii dilku dhacay, kamana uusan mid ahayn kuwii weerarka geystey, waxa uu joogey magaalo lagu magacaabo Xaaji Cali oo qiyaastii 350okm Waqooyi ka xigta magaalada Muqdisho. Waxaana uu sheegay in ay heleen toddoba qof oo xaqiijiyey in uu halkaas joogey".

Sidoo kale weriye ilaria Alpi hooyadeed waxay tidhi taasi waxay ahayd "Maqaar saar qofka oo eed uusan lahayn dusha laga saaray si dhammaantayo naloo aamusiyo". Halka uu Xaashi Cumar Xasan waxa uu rajaynaya in maxkamadda dib loo saaro markale iyadoo arrinta lagu samaynayo Jeelle oo markhaati furkiisii laga dhigayo waxba kama jiraan." Weriye Alpi iyo sawir-qaadaheedu waxay Soomaaliya u tageen in ay baadhitaan ku sameeyaan hadhaaga sunta halista ah ee lagu aasey dhulka Soomaalida, waxayna doonayeen in ay akhbaarta ay helaan u soo bandhiggaan shacabka, sidaas waxaa sheegay warbixinno badan oo la qoray kaddib dilkii

Muqdisho lagu diley weriyayaashaas.

Haddaba dhawaan waxa dhacdey in Xaashi Cumar lasoo daayey, oo xorriyadiisii dib loogu soo celiyey. Maxkamadduna ay wax dembi ah ku weyday, iyadoo xadhigiisa muddada 15sanno aheydna ku tilmaamtey gef iyo gabood fal ay kula kaceen. Waxaana ay intaas ku dareen in ay magdhow iyo raali-gelin ka bixin doonaan. Walow uu arrintaas Xaashi ka diidey. Waxa aan kusoo gabo-gabeynayaa qeybtan in weriye ilaria Alpi iyo sawir qaadaheedu ay inaga mudanyihiin in goobtii lagu diley looga dhiso taallo lagu xuso laguna xassuusto, maadaama ay Qaranka iyo Ummada Soomaaliyeed baddooda iyo dhulkooda darteed loo diley labadoodaba.

Qeybta 5aad: Falkaaha iyo Saameyntiisa

Waxaa xaqiiqo biyo kama dhibcaana ah in sunta lagu shubay badaha Soomaaliya ay leedahay falkaah(radiation) oo ah qashinkii warshadaha adduunka, kuwaas oo marwalba soo deynaya shucaacyo falaadho falkaah ah oo aad u khatar badan. Halista ay leedahay ayaa waxaa kamid ah in falaadhahaa falkaaha ah ay khal-khal ku ridayaan



tarimidii unugga oo uu deedna qofkii ku sababay xanuuno halis ah sida Cancer iwm, sababtoo ah kansarku waa khal-khal ku dhaca unugyada habka ay u tarmayeen oo meeshii hal unug laga rabay ayaa laba iyo saddex kasoo baxayaan, waxaana sabab u ah radiation-kan halista badan. Waxaan sharax faahfaahsan ka bixin doonaa habka falkaahan usoo baxayo iyo sida uu u saameynayo bulshada goobtaas ku nool iyo kuwa ku hareeraysanba. waxaa iyaduna xusid mudan in sababta dabshidyadan dambe ay usoo bateen xannuuno aan la aqoon ay sabab u tahay sunta badaha kasoo kaaheysa ee kalluunka saameysay, bulshadiina ay kaluunka quudaneyso iyada oon ka war heyn.

Aynu marka hore isla ogaano falkaaha iyo wuxuu yahay. Falkaaha waxa lagu qeexaa: soo deynta qurub hoosaaadyada ama falaadho kuwaas oo kasoo baxaya bu'da uu qurub leeyahay. Falkaaha soo baxayaa wuxuu noqon karaa laba mid uun, mid dabiici ah(Natural Radioactivity) ama mid gacan-sameys ah(Artificial Radioactivity). Noocyada falkaahyada ayaa waxa loo qeybiyaa saddex qeybood oo kala ah (Alfa, Beta iyo Gamma), falkaahyadan mid kasta waxay leedahay astaamo u gaar ah oo lagu ogaado.

1. Falkaaha koowaad waa Alfa: Waxa lagu magacaaba waa qurub danabkiisu toganyahay kaas oo laga soo daayo curiye falkaah leh, waxaana laga soo daayaa curiyaha hilyam(Helium) waxa uu ku socdaa xawaare 10% ka ah xawaaraha ilayska marka la barbardhigo, wuxuu leeyahay awood aad u sareysa oo uu ku danabeyn karo molokuuylada hawada. Waxa la yidhaahdaa awoodda uu shey kaga dhex bixi karo way yartahay qiyaas ahaan waa dhowr sentimitir hawada dhexdeeda. Waxaana joojin kara maqaarka noolaha ama warqad, hadii aynu wax ka sheegno curiyayaasha kale ee soo daaya falkaaha sida; alfa waxaa ka mid ah (Radium, Uranium, Thorium, Americium) waxa lagu dareema ama lagu ogaan karaa filimka la geliyo kameradihii hore ee loo yaqaannay 36ka ama qalab loo yaqaan Cloud Chamber. Waxa xusid mudan in curiyahan loo yaqaanno Uranium-ta laga sameeyo nuclear-ka adduunka ee badaheenana qashinkiisa lagu duugey.




Qalabka Geiger Muller

2. Falkaaha labaad waa Beta: Waxaana lagu qeexaa waa elektoroon danabkiisu tabanyahay kaasoo kasoo baxa bu'da curiye falkaah leh, waxa uu ku socdaa xawaare 90% ka ah xawaaraha ilayska marka la barbardhigo awoodda ay shey ku danabeyn karaan way hooseysaa marka la barbardhigo falkaaha alfa. waxa ay leeyihiin awood ay shey kaga dhex bixi karaan, waxaana joojin kara uun dhowr sentimitir oo ah curiyaha almuuniyaam. Curiyayaasha soo daaya falkaahan waxaa kamid ah (Carbon-14, Tritium, Sulphur 35 iyo Strontium). Waxaana lagu dareemaa filimka lageliyo kaameradaha 36ka, qalabka loo yaqaan Geiger-Muller iyo Cloud chamber.

3. Falkaaha saddexaad waa Gamma: waxaa lagu qeexaa falkaah elektoromagnet ah oo aad u sarreeya oo laga soo daayo bu'da uu leeyahay qurub. Wax danab ah maleh, waxa ayna ku soocaa xawaaraha ilayska waaxana ay leedahay awood danabeyn oo hooseya iyo awood ay shey kaga dhex bixi karto oo aad u sareysa. Waxaana lagu yareyn karaa awooddeeda dhowr sentimitir oo birta lead ah, badanaa soo deynta falkaaha gamma waxay dhacdaa kadib soo deynta falkaahyada alfa iyo beta. Curiyayaasha soo daaya falkaaha gamma waxa kamid ah(iodine-131, cesium-237, radium-226, technetium-99, cobalt-60). Qalabyada lagu dareemo ama lagu ogaado waxaa kamid ah filimka kaamerada-36, cloud chamber iyo Geiger-Muller Counter.

TYPES OF RADIATION AND PENETRATION



Haddii aynu soo sharraxnay falkaaha iyo qeybihiisu waxa ay kala yihiin oo aad soo fahantay, imika waxa aynu u gudbi doonaa wax la yidhaa burburka falkaaha(Radioactive Decay) oo ay muhiim tahay inaad si fiican u dhugato sababtoo ah waa bartan halkaad ka fahmi laheyd falkaaha ay samaynayso sunta badaha Soomaaliya ku jirta iyo sidey u dhaqmayso. Burburka falkaahu waa habka ay bu'da qurubku u burburayso keddibna ay usoo daynayso falaadho. Burburka falkaahana waxa loogu yeedhaa (Spontaneous) oo macnaheedu yahay


ma saameeyaan qoddobada deegaanku sida; heerkulka, caddaadiska iyo fal dedajiyaha(Catalysts).

Arrintan waxa looga jeedaa qoddobadani ma badin karaan mana yareyn karaan burburka falkaaha ee wuu ka madax bannaanyahay. Waxa sidoo kale jira wax la yidhaa “Activity“ oo ah inta tiro ee bu’ ah taasoo burbureysa seken kasta waxa aaney leedahay halbeeg lagu cabiro oo la dhaho “Bacquerel (Bq)“. Intaas kaddib haddeyni u gudubno noocyada burburka falkaaha taas oo aynu u qeybin doono saddex oo kala ah sidii hore-ba uu ukala qeybsanaa ee (burburka Alfa, burburka Beta, burburka gamma) mid walbana waynu dul istaagi doonaa. Burburka Alfa, curiyayaasha falkaaha leh waxa ay soo daayaan qurubka alfa si ay u noqdaan stable(oo macnaheedu yahay qaar aan wax ku dheeraad ah ama ka dhiman aanu jirin) badanaa curiyayaasha leh borotoroono iyo niyuutaroono badan ayaa soo daaya qurubka alfa.

Haddaba burburka alfa marka la joogo, sida aynu ognahay curiyuhu wuxuu leeyahay laba shey oo ah (Atomic number (Z) iyo Mass number(A)), ka hore waxa uu qeexa inta borotoroono ah ee uu curiyahaasi leeyahay, kan dambena wuxuu qeexaa inta culays ah ee uu curiyahaasi leeyahay. Haddaba burburka alfa (Atomic Number-ka) waxaa ka go’a laba borotoroon. waxaana (Mass Number-ka) ka go’a afar niyuutaroon iyo borotoroon maadaama uu Mass Number-ku ka koobanyahay (Borotoroon iyo Niyuutaroon).

Burburka beta isagu wuu ka duwanyahay kan kor aynu kusoo sheegnay. Burburka beta waxa la soo daayaa marka uu hal niyuutaroon uu u kala jabo borotoroon iyo elektoroon, kaddib elektoroonku wuxuu uga baxaa dibadda qurubka. Haddaba burburka beta Atomic Number-ka waxaa ku darsama hal, Mass Number-kuna sidiisa ayuu ahaada oo waxba kama go’aan.

Radioactive Alpha Decay



Due to alpha decay, two protons and two neutrons are emitted.
In the case of Uranium 238, it decays into Thorium-234.



Burburka gamma”: labadii aynu soo sheegnay isna sidoo wuu ka duwanyahay. Curiyuhu wuxuu falaadhaha gamma u soo daayaa si uu iskaga yareeyo tamar dheeraad ku ah. Marka lasoo daayo gamma Atomic Number-ku sidiisa ayuu ahaanayaa, Mass Number-kuna sidiisa ayuu ahaanaya laakiin falaadhaha gamma waxa ay sidaan tamar. Sidaas darteed tamartaas uu sido gamma waa nooc halis ku ah dadka iyo deegaankaba. Waxa ay falaadhahaasi daldalooliyaan lakabyada gibilka sare ee hawada. Taas oo falaadhaha cadceedu ay toos usoo galeyaan deegaanka. Waxaana falaadhaha cadceeda oo toos ugu soo dhaca maqaarka aadamaha ay ku sababtaa jaadad kamid ah xanuunka kansarka maqaarka.

Haddaba marka uu curiye burbur falkaah ku dhaco ee uu Atomic Number-ka ka go’o laba borotoroon, Mass number-kana uu ka go’o afar borotoroon iyo niyuutaroon qurubyadaas laga soo daayey bu’da qurubka(atom) waa kuwa sababaya falkaaha (radiation), kaddibna ku baahaya deegaanka oo cudurrada sababaya, sida: kansarka oo kow ka ah iyo khalkhal ku dhaca chromosomes-ka (hida-sidayaasha), kudduudiyaha(meningitis), cudurrada maqaarka, xannuunada khalkhalkal habdhisyaada aadamaha (Conginetal Abnormalities ay kamidka yihiin isku daloolka wadnaha. Waxaana xannuunadaasi ay aad ugu badanyihiin carruurta gaar ahaan ilmaha uurka ku jira maadaama uu isagu ku jiro xaaladii abuuritaanka, waana ta keentay in carruur badan oo Soomaaliya ku dhalatay dabshidyadan dambe ay noqdaan kuwa aan xubnahoodu dhameystirenyn, oo ay dhashaan iyagoo xubnihii laga saxaroonayey ama la kaadinayey aan laheyn, biyo madaxa kaga jira iwm. Waxaana xusid mudan badanaa dadkii sagaashamaadkii dhashey iyo horraantii qarniga 21 waa ka madax bannaanyihiin congenital abnormalities-ka ama wuuba ku yaryahay. Taas oo ay sabab u tahay waaggaas oo suntu cusbeyd, saameyn badanna aysan laheyn. Hadda se waxa laga joogaa ku dhawaad 30sanno. Haddii dadka waaweyni ay ka badbaadeen xannuunadii khalkhalka ee uur ku jirta, waxa ay halis ugu jiraan kiwa deegaanka oon sinnaba looga baxsan karin.



Muuqaalka noocan ah ee caruurta Soomaaliya ku dhalanayso dabshidyadan dambe waa muuqaal runtii argagax iyo amakaag wata, waxaana sababay sunta deegaanka ee soo kaaheysa ama falkaaha soo deynaysa, taas oo




maqaarkii noocan ka dhigtey. Waxa kale oo jirta sida dhakhaatiir Muqdisho joogta ay caddeeyeen oo muuqaalo laga soo duubey in carruurta qaar ay ku dhalanayaan iyaga oo aan laheyn xubnihii laga saxaroonayey iyo laga kaadinayey. Arrintanina sida aan hore u soo sheegay waa isbeddel ku dhacay hide-sidayaasha(chromosome mutation). Waxaan isku dayi doonaa inaan dul istaago isbeddelkan ku dhacaya hide-sidayaasha. Waxaa jirta in noolaha oo dhan uu leeyahay hide side u gaar ah kaasoo isaga gudbaya fac ka fac oo ma jirto in insaanku uu dhalo xayawaan ama dhir ee wuxuu dhalaa wax isaga u eg taasna waxa sababay hide-sidayaasha oo isaga gudbaya fac ka fac kuna jaango'an waalidka jaadka/nooca ay yihiin Haddaba ilmuha Aadamahu marka uu sameysmayo wuxuu aabaha ka helaa 23 hide-side, halka uu hooyadana ka helo 23 hide-side taas oo marka la isku daro noqoneysa 46


hide-side. Marka lagu gudo jiro isku darsanka hide-sidayaasha ayaa waxaa dhici karta iyadoo kolba loo eegayo xaaladaha ku hareeraysan deegaanka inuu isbeddel ku dhaco hide-sidayaasha arrintan waxa la dhahaa marka aqoonta hide-sidayaasha la baranayo (Chromosome Mutation).

Qeybaha si guud loogu qeybiyo isbeddelkan waxa weeye (Germ Cell Mutation iyo Somatic Cell Mutation), kan hore (GCM): waxa weeye isbeddel isaga gudbaya fac ka fac. Noocan GCM waxa kamid noqon kara Cancer-ka, Congenital Abnormalities iwm. Halka kan dambe uu yahay isbeddel ku dhacaya inta uu ku jiro xilli nololeedkiisa (life time), waana midka deegaanka iyo isbeddelka cimiladu ay ka qeyb qaadanayaan. Waxaama tusaale u ah: maqaarka qolofa leh, mushkilado dhanka maskaxda ah, cancer noocyadiisa kala duwan iwm. Haddaba marka aynu Mutation-ka joogno waxaa sigaar ah loogu sii qeybiyaa wax layidhaa 1- (Point Mutation): waxa weeye isbeddelka kiimikaaleed ee ku dhaca hal ama laba nukliyootaaydhyo (nucleotides), point Mutation wuxuu ku lug leeyahay isu beddelka hal nukliyootaaydh lagu badalo mid kale ama kusoo darida ama ka tuurida hal ama wax badan oo nukliyootaaydh ah. Nukliyootaaydh (Nucleotide) waa waxa ay ka sameysanyihiin hide-sidayaashu.

Qeybta kale waxa layidhaa 2- (Chromosomal Mutation): kaas oo ah isbeddel ku dhaca qaab dhismeedka hide-sidaha iyo isbeddel ku dhaca tirada hide-sidaha. Haddaba waxaan hada faahfaahin doonaa meesha ka khuseysa mawduuceena sunta. Waxa aynu soo sheegnay in Chromosomal Mutation-ka si gaar ahaaneed loogu sii qeybiyo isbeddel qaab dhismeed iyo isbeddel tireed. Isbeddel qaabeed dhismeedka waxa si hoose loogu sii qeybiyaa afar qeybood ta koowaad waxa la dhahaa (Translocation): qeybtan qurub hide-sidayaasha kamid ah ayaa aan ku dhagin qeybtii kale uu lahaa marka uu dhacayo waxa la dhaho (Crossing Over); oo ah marka 46 hide-side ay qaabeynayaan ilmaha la abuurayo.



Markaa isbeddel hoosaadkan Translocation-Ka loo yaqaano wuxuu sababaa xanuun loo yaqaan (Leukemia)



isbedelkani wuxuu ku dhacaa inta dhaxeysa hide-sidaha 9aad iyo 22aad, xanuunkani Af-Soomaali wuxuu ku noqonayaa “Kansarka dhiiga”, waana mid bulshadeena Soomaaliyeed kusoo badanaya hada gaar ahaan ku badan carruurta yar yar. Waxaana loo sababeyn karaa waa abuurkoodii markii lagu gudo jirey oo falaadhihii sunta ee loo yaqaanay falkaaha (radioactive) ama burburka falkaaha noocaydiisii (Radioactive Decay alfa, beta, gamma) aynu soo sharaxnay ay ku dhaceen hide-sidihii ilmaha ee qaabeysmayey keddib uu asiibey xanuunkani ama xanuuno kale oo aan hore loo arag.

Runtii xannuunadan sunta laga qaadayaa waxa ay u badanyihiin kansar sababtuna waxa weeye sida aan hore usoo sheegay in kansarku yahay khalkhal ku dhacay unugga sidii uu u tarmi lahaa oo meeshii hal unug ama laba unug laga rabey ayaa tiro ka badan tii loo baahnaa kasoo baxaysaa. Waxa kale oo soo raaca maqaarka qolfoofka noqonaya. Kansarka laga qaado falkaaha waa noocyo badanyahay waxa kamid ah: kansarka naasaha, kansarka maskaxda, kansarka qanjidhka thyroid-ka, kansarka dhuuxa ee unugyada dhiiga ee cad-cad. Dhammaan noocyadani Soomaalida si xad dhaaf ah ayey dabshidyadan dambe ugu dhacaan. Waxa aynu ka xusi karnaa dhacdooyinka saameynteed ee lasoo tebiyey kuwo ay kamid yihiin:-

Waxa sidoo kale jirta in Soomaaliya lagu arkay xannuuno aan hore loogu arag adduun weynaha intiisa kale oo astaamo iyo calaamado cusub wata. 28kii Oktoobar 1998kii dhakhtar kamida Hay'adda Unicef oo la dhaho Dr. Pirko Heinronen wuxuu sheegay: "Bardaale oo ah galbeedka Baydhabo inuu ka dilaacay xannuun aan la aqoon kaasoo laba bilood gudahood ku diley 120 qof, sumadihiisana waxaa kamid ah xumad daran, gariir jidhka oo dhan ah, dhiig sanko iyo ciridka ilkaha kasocda ". Waxa sidoo kale Juun 1998kii xumadaas oo kale waxaa lagu arkay aagga Warsheekh, gaar ahaan tuulooyinka cadale, ruun-mirgood. Intii u dhaxeysay Janaayo iyo Febraayo 1998kii waxaa shabeellada Hoose ku dhintay darsin dad ah oo u dhintay xumad aan la aqoon oo tii hore oo kale ah. Waxyaabo badan ayaa dadka Soomaaliyeed lagu arkayaa dabshidyadan dambe. Waxa sidoo kale iyaduna xusid mudan in bad-gariirka ka dhacay baddeena ama badaha xidhiidhka la leh sida: indian ocean-ka uu keeni karo in suntii gunta hoose ee badda lagu aasay ay soo baxayso oo soo caariyayso. Marka suntu ay soo caariddo waxa ay sii deynaysaa falkaahii deedna waxay sababeysaa xannuuno dadka deegaankaas ka agdhow iyo kuwa ka fogba.



Sida dhacdooyin badan oo ay kamid yihiin Janaayo 1997kii inta u dhaxeysa gobolka Mudug iyo Nugaal dad badan ayaa xanuun ku dhacay kaddib markii ay cabeen biyo ku jirey qalab xeebta ay ka heleen, dhiig badanna uu uga furmey caloosha iyo afka. Arrintan mid lamida waxa ay ka dhacday gobolka Galgaduud bishii Ogoosto dabshidkii 1998kii, sidaa si lamid ah dabshidkii 1994kii magaalada Marka dad badan ayaa uu ku dhacay cudurka kansarka ee carrabka. 22kii Juun 1998kii, qoraal ay faafisey Hay'adda wararka ee Iiibiya oo soo koobay warbixin cilmi baadhis uu sameeyey nin lagu magacaabo "Kadhem Amoudi" oo ah Algerian wuxuu yidhi: " Dhimashada xad dhaafka ah ee geela Soomaaliya waxaa sababtay sunta hadhaaga ah ee nukliyeerka ". Sidaa si lamid ah 15kii Juun 1998kii sidoo kale warbaahinta Iiibiya waxay faafisey in sidaasoo kale ka dhacday Baydhabo waxa aanay saameysay kumanaan dad ah oo deganaa aagga Sayid Hilow iyo Buulo Barakow.



5tii iyo 7dii bishii diisembar 1995kii waxa ay qaraxyo ka dhaceen gobolada Sanaag, Sool, Saaxil qaraxaas maalintii xigtey waxaa ku dhacay dadkii deggenaa goobahaas neef qabasho, shuban, bulshada goboladaas degan tiro carruur ahna waa u dhimatey. Weriyaal ay ka mid yihiin Luciano Scalettari ayaa booqday xeebta Warsheikh kaddib Bad-gariirkii 2004tii. Waxayna halkaas kula kulmaan dadka degaanka qaar kamid ah oo sheegay in cudurro aan hore loo aqoon ay la soo derseen. H. Shikey Ajad oo ah Kalkaalliye Caafimaad oo ka shaqeeya Warsheikh

ayaa yidhi waxaan xannuunada ku arkay ilaa 50 qof oo xitaa qaarkood Xamar loo qaaday waayo annagu daawo uma hayno, dadkaas Warsheikh oo keliya kama imaan ee waxa kale oo dadka xannuunsani ka yimaadaan labada dhinac ee magaalada. Yuusuf Maxamed Xuseen oo ka shaqeeya qaybta Faya-Dhawrka ee Tuulada Mesagaweyn ayaa sheegay in hal bil gudaheed ay daweyeen 230 qof oo badankoodu ahaayeen dadka qaba cudurrada maqaarka ama cuncunka. Sidoo kale Gabriele Lonardi oo ah dhakhtar ka tirsan INTERSOS-ka oo booqday

xeebaha Soomaaliya ayaa sheegay in uu halkaas ku arkay dad qaba cudurro aan la aqoon oo lala yaabay.. Waxana uu yidhi hadal Af-Soomaali ahaan u dhigma "WAA WAREEEY! Ama HAYAAY"



Maqaal: Mahadnaq Gaar Ah

Maqaalkan waa mid muhiim iyo dhiiri gelin u ah dad gaar ah oo shacabka Soomaaliyeed kamid ah, kuwaas oo wax aan abaalkooda la gudi karin u qabtay dadka iyo dalka Soomaaliyeed oo u baahan in taalLo loo dhiso lagu xasuusto laguna xuso halganka ay dadka iyo dalkaba u galeen darteed. Dadkaas khaaska ah waa dadka loogu yeedho “BUDHCAD-BADDEEDA”, oo aan ka yaqyaqsanayo in aan magacaas foosha-xun ugu yeedho maadaama oo aysan istaahilin oo gef iyo gardarro weyn uu ku yahay. Waa wiilasha badaha Soomaaliya cadow bahaloobay oo badaheena usoo socday ay iyaga dartood kaga noqdeen, sidoo kale-na ka yareeyeen suntii badneyd ee ay lasoo doonan jireen badaha Soomaaliya. Waa dad runtii cadowgu magacyo kala duwan oo shacabka argagax u gelinaya loogu yeedho sida: aragaxiso, budhcadda badda iwm. Laakiin xaqiiqdu ay tahay dad u dulqaadan waayey oo ka dhiidhiyey hoogga iyo haggardaamada lagu hayo badaha Soomaaliyeed ee ay dhaxalka u leeyihiin.



Laba saddex iyo ka badan oo erayo iyo buggaag ama maqaalo ah laguma soo koobi karo shaqada dhaxal galka ah oo taariikhda geli doonta ee ay inoo qabteen, oo aan la qiimeyn kareyn abaalka ay ku leeyihiin shacabka Soomaaliyeed, kuwaas oo nafta iyo wax kastaba u hura cadow ka dhicinta badaha Soomaaliya. Waxaan qof kasta oo Soomaalinimo qiimo iyo qadarin ka leedahay agtiisa ka codsanayaa in uu ku fiiriyo indho iyo caqli furan oo dhugasho leh wixii taageero uu u fidin karana aanu kala hagnan. Dadkaas is xilqaamay waxa ay u badanyihiin dadka xeebaha Soomaaliya dega oo ay kamid yihiin: Boosaaso, Laasqorey, Warsheekh, Hobyo iwm, waana abaal uu shacabka Soomaaliyeed u hayo kuwaas oo xil iyo mas'uuliyad iska saaray ilaalinta badaha Soomaaliya intii karaankooda aheyd. Waxaa iyaduna xusid mudan

hooyooyinka Soomaaliyeed ee wiilashooda dilka iyo xabsiga lagu xukumey badaha ay difaaceen darteed oo loo baahanyahay hooyooyinkaas in indho gaar ah lagu eego, waa hooyooyin halgamay oo Soomaalinimadu ka dhab tahay kuwii ay dhaleenna ee ay u dhibtoodeen dartoodna u hurey dalka iyo dadka Soomaaliyeed difaaciddooda.

Soomaalidu waxa ay ku maahmaahda abaal nin gala waala arkaa se nin guda lama arke e, abaalka ay u galeen dalka waa mid baal dahab ah lagu qori doona intii sooyaal Soomaaliyeed jiro, se u baahan in maan furnaan lagu fiirsho oo dhagaha laga fureysto cadowga reer galbeedka ee badaheenna usoo miliqsanaya. Waana Eebe mahadii haddii wiilal naga waabsha cadowga badan ay jiraan maanta. Walow tan iyo hawlgalkii Atlanta weerar culus lagu qaadey oo aysan sidii hore u xooganeyn. Waxaa ayaan darro weyn innagu ah shacab weynaheena Soomaaliyeed qaar kamid ah in ay dhaleecayn badan innaga faafiyeen oo bulshadeena laga soo qaaday dad tuug ah oo badaha ka afduubta maraakiibta adduunka, oo wiilashenii Soomaaliyeed ay qaateen door argagixiso filimaan badan oo felsafadda ka dambeyna ay tahay in boodhka lagu qariyo dulmiga lagu hayo badaheena.

Waxaa midaas nooga daran in wiilka Soomaaliyeed ee filimkaa matalaya aanu ka war heyn hogga mugdiga ah ee uu bulshadiisa uu ku ridey iyo sida uu shacabkiisa uu uga faafiyey sawir xun oo adduun weynuhu uga tusaale qaadan doono dalkeena iyo dadkeenaba oo ah in ay soomaalidu yihiin bulsho tuugnimo ku nool oo weligood horumarka tiigsan iyo in weligeenba aynu nolosha door hooseeya ka qaadanno. Waxa jirta in hadh iyo habeen cadowgu badaha Soomaaliyeed uu qorsheynayo hawlgalo uu rabo in uu ku dabar jaro dhaqdhaqaaq kasta oo Soomaali leedahay oo badaha lagu difaacayo, tusaale ahaan: Hawlgalka loogu magac darey Halwgalka

Atlanta(Operation Atlanta) kaas oo la bilaabey bishii December 2008dii oo looga dan lahaa in la ilaaliyo maraakiibta badda Soomaaliya mareysa ee WFP iyo AMISOM, la dagaalanka dhaqdhaqaaqa budhcad baddeeda, ilaalinta dhaqdhaqaaqa kalluumeysiga ee xeebaha Soomaaliya iwm oo ay tilmaameen in ay u socdaan, se ujeedadu middaas waa ka da' weyntahay, waana dabar jarka halganka difaacidda badaha Soomaaliya iyo soo daabulidda qashin kasta oo meel loo waayey, lagana dhigo badda Soomaaliya bahalo galeen cid walba dhex joogto.



Maqaal: Rajada Shacabka Soomaaliyeed

Arrintani waxa ay khuseysaa qof kasta oo Soomaaliyeed oo rajo ka leh dhulkan iyo dadkan. Waxaadna ku baraarugsanaataa “Soomaaliyahow halis baad dhex huridaaye toos” Soomaaliyahow sun baad dhex joogtaaye toos”. Marka aynu kasoo hadallney mawdduuca sidaas u halista badan oo aynu soo falanqeynay. Waxa iyaduna lagama maarmaan ah in la isweyddiyo oo la baadhbaadho Maxaa Xal ah? Walow xalku uusan ka go’aan gaadhi karin hal qof oo Soomaaliyeed (aniga), oo ay tahay in Soomaali intii rabta in ay wax ka qabato dhibaatan ay isku tashtaan oo deddaal iyo halgan wax ku ool ah ku dhaqaaqaan, ayaa haddana waxa qoraha mawdduucan looga fadhiyaa isaga fekerkiisa ku qotoma xalka arrintan, maadaama oo uu kamid yahay Shacabka Soomaaliyeed.

Waxaan isku deyi doonaa bal wixii aan xal u arko in aan soo bandhigo haddii Eebe i waafajiyo. Ugu horreyn horta dawlad Soomaaliyeed oo aynu arrintan kala kaashanaa in aysan jirin waad la socotaan ama se wax ka qaban karta dhibta intan le’eg, se waxa jiri karta taakuleyn iyo wixii karaankeeda ah in ay inaga caawiso dawladda Soomaaliya oo iyadu u muuqata meel saansantii dawladdnimo weli ay kasii jirto. Haddey noqon laheyd in magaceeda aynu ku doodno ama se wixii aynu u baahanahay ku codsan karno magaceeda. Haddaba qoddobada aan xal u arko waxa kamid ah:

1. In marka koobaad la isku deyo in la abaabulo dhaqdhaqaaq, jamciyad, ururr ama team arrimahan ku shaqo leh sababta oo ah qof keli ahi waxba kama qaban karo arrimahan oo aad bay u cakirran yihiin haddeyn noqon laheyd dhanka wax ka qabashada, baraarujinta iwm.
2. Mar labaadka waa in kooxdaasi isku deydaa in ay sameyso baaadhitaan dhameystiran oo ku saabsan sunta badda iyo berriga ku aasan, kaas oo dhammaan dhulka Soomaaliyeed lagu kormeerayo, gaar ahaan goobaha sunta looga shakisanyahay. Waxa iyaduna muhiim ah in baadhitaanku uu noqdo mid isku jaan go’an oo report-kiisa wata, gorgortan heer caalami ahna aynu gaadhsiin karno. Waxa iyaduna in la xuso mudan in report-ka ama baadhitaanka laga diyaariyo arrintaas lagu daro Documentary maqal iyo Muuqaal ah oo Af-Soomaali ah, halka subtitle-kana laga dhigayo Af-Carabi iyo Af-Ingiriisi. Taas oo inaga caawin karta in ururro heer Qaarad ah iyo kuwa heer Duni ah aynu hor dhigi karno.
3. Mar seddexaadka marka aynu intaas dhameystirno talaabada seddexaad ee inala gudboon waa in goobihii suntu in ay ku jirto la habsadey la isku deyo in laga fogaayo wixii dad iyo duunyaba ah, oo la karantiimeeyo lana dejiyo markaas qorshihii suntan looga takhalusi lahaa.
4. Mar afraadka waxa inala gudboon in wixii dhaawac iyo dhibaaato ay sababtey muddadii ay suntani aasneyd ay ku sababtey dadka la isku deyo in la dayac tiro dhibtaas. Haddey noqon laheyd dhibaatooyinka falkaaha, wasakhda iyo caafimaad darradaba.
5. Marka shannaad waxa inala gudboon in la aasaaso xarun cilmi-baadhiseed oo ka shaqeysa arrimahan sunta, laguna daraaseeyo dhibta ka dhalatey sunta iyo saameynta ay ku yeelatey dadka ku nool deegaanka, haddii ay noqon laheyd mushkilado dhinaca dhaqan iwm. Sidoo kale-na lagu go’aamiyo hababka kala duwan ee loola dhaqmi karo iyo sida loo daaweyn karaba.
6. Mar lixaadka waxa inala gudboon in aynu u hawlgalno sidii loo dardar gelin lahaa gorgortan ka dhan ah aafada loo geystay dhulka, badda iyo dadka Soomaaliyeed ee baylahda ahaa, innagoo dacwado, dooddo heer caalami ah la galeyna cidii ka dambeysay arrintan aadka u halista badan, gaar ahaan intii kanool dadyowgaas iyo dalalkii, hay’adihii ka mas’uulka ahaa.

Qodobadaa lixda ah ayaa iigu muuqda rajo aan u jeedin karo shacabka Soomaaliyeed. Waxa maangal ah in qoddobadan ay qaar wax ku ool ah oo arrintan wax lagaga qaban karo noqon waayaan, oo qoddobo ka fiican la keeni karo, se laakiin taasi waa u furantahay cid kasta oo rabta in ay ka qeyb qaadata wax ka qabashada arrimahan. Runtii qoddobadani marka la qorayo ama afka laga odhanayo aad bay u fududyihiin, laakiin in gacmaha laga fuliyaa waa arrin aad u adag oo samirkeeda iyo deddaalkeeda loo baahanyahay, haddii kale deddaalku wuxuu noqonayaa hal bacaad lagu lisey.

Ugu dambeyn waxa aan bulshada Soomaaliyeed madax iyo minjaba usoo jeedinayaa in ay u hawlgalaan sidii arrintan halista ah wax looga qaban lahaa, intii aysan noqon afo wax laga qaban kari waayo, taas oo sababta in dhulkan Soomaaliyeed arrintaas darteed loogu noolaan kari waayo mustaqbalka. Arrintan wax ka qabashadeedu ma aha mid dib loo dhigi karo, sababtoo ah hadda ayayba tahay mid laga daahey/raagey wax ka qabashadeeda oo saameyn ba'an ujeednaa, taasoo ay aheyd in mar hore lagu baraarugo, se imika iyo haatanba wax uun waa la tari karaa, koley ahaataba baraarujin iyo ka hortag la sammeeyo oo la xidhiidha sunta halista ah ee ku duugan Soomaaliya iwm.

Tixraacyada Daraasadda

1. Q 1aad: Qashinka iyo sunta halistaa ee loo dhoofiyo dunida saddexaad: macnaha iyo ujeedooyinka qorshahan gurracan iyo siduu u saameeyey soomaaliya iyo afrika

By Bashiir Sheekh Maxammad

<http://www.somalitalk.com/sun/1.html>

2. Q 2aad: Afrika awood xirfadeed iyo qalab ma u haysataa habaynta suntaas

By Bashir Sheekh Maxammad

<http://www.somalitalk.com/sun/2.html>

3. Q 3aad: Qawaaniinta caalamigaa by Bashir Sheekh Maxammad

<http://www.somalitalk.com/sun/3.html>

4. Q 4aad: XAQIIQADA IYO XOGTA QASHINKA IYO SUNTA LOO DHOOFIYO SOOMAALIYA

<http://www.somalitalk.com/sun/4.html>

5. Q 5aad: XAQIIQADA IYO XOGTA QASHINKA IYO SUNTA LOO DHOOFIYO SOOMAALIYA

<http://www.somalitalk.com/sun/5.html>

6. Q 6aad: XAQIIQADA IYO XOGTA QASHINKA IYO SUNTA LOO DHOOFIYO SOOMAALIYA

<http://www.somalitalk.com/sun/6.html>

7. Q 7aad: XAQIIQADA IYO XOGTA QASHINKA IYO SUNTA LOO DHOOFIYO SOOMAALIYA

<http://www.somalitalk.com/sun/7.html>

8. Q 8aad: XAQIIQADA IYO XOGTA QASHINKA IYO SUNTA LOO DHOOFIYO SOOMAALIYA

<http://www.somalitalk.com/sun/8.html>

9. Q 9AAD: Adduunka oo Hadda Kusoo Baraarugey Halista Sunta Lagu Duugey Soomaaliya

<http://www.somalitalk.com/sun/9.html>

10. Q 10aad: Dhulkaan dadki lahaa meeyey? By Ali Malaaq Ahmed

<http://www.somalitalk.com/sun/10.html>

11. Q 11aadL: Faalooyin kookooban oo uu soo diyaariyey Wardheere

<http://www.somalitalk.com/sun/11.html>

12. Q 12aad: Hal qof ayaa dhintay laba kalane dhaawac xoogan ayaa soo gaaray saakay kadib markii ay ku sumoobeen sunta ay maraakiibta shisheeye ku soo daadiyeen xeebaha dalka soomaaliya gaar ahaan xeebaha gobolada Jubooyinka

<http://www.somalitalk.com/sun/12.html>

13. Q 13aad: Shir Jaraa`id oo ku saabsan cudurka Kaduudiyaha oo maanta lagu qabtay magaalada muqdisho
<http://www.somalitalk.com/sun/13.html>
14. Q 14aad: Haamo Waaweyn oo kusoo Caariyey Xeebaha Gobolka Jubbada Hoose
<http://www.somalitalk.com/sun/14.html>
15. Q 15AAD: Wareysi Maalinta Deegaanka
<http://www.somalitalk.com/sun/15.html>
16. Q 16aad: MUNAASABAD LAGU MAAMUUSAYAY MAALINTA DHIRTA ADUUNKA OO KA DHACDAY GALKACYO
<http://www.somalitalk.com/sun/16.html>
17. Q 17aad: MAALINTA DEGAANKA ADDUUNKA IYO SUNTA SOOMAALIYA
<http://www.somalitalk.com/sun/17.html>
18. Q 18aad: Hay`adda DBG oo soo Bandhigtay Khatarta 15 Haamood oo ku soo Caariyey Xeebaha Soomaaliya
<http://www.somalitalk.com/sun/18.html>
19. Q 19aad: Sunta ku Duugan Jidka u Dhexeeya Garoowe & Boosaaso
<http://www.somalitalk.com/sun/19.html>
20. Q 20aad: Wakiilka Qaramada Midoobey, Axmadu Waldu Cabdalla, oo sheegay in si sharci darro ah loo guranayo kheyraadka dalka Soomaaliya
<http://www.somalitalk.com/sun/20.html>
21. Q 21aad: Xeebta Soomaaliya: Qashinqubka EU
<http://www.somalitalk.com/sun/21.html>
22. Q 22aad: Warqaddii Cali Mahdi Ku Ogolaaday in Sunta Halista ah Lagu Duugo Soomaaliya
<http://www.somalitalk.com/sun/22.html>
23. Q 23aad: Wareegtadii Cali Mahdi Ku Ogolaaday in Sunta Halista ah Lagu Duugo Soomaaliya
<http://www.somalitalk.com/sun/23.html>
24. Q 24aad: Wareegtadii Cali Mahdi Ku Ogolaaday in Sunta Halista ah Lagu Duugo Soomaaliya
<http://www.somalitalk.com/sun/24.html>
25. Q 25aad: Dhibaatooyinkii Sunta Lagu Duugey Soomaaliya Intii u Dhaxaysey 1992 ilaa 1998
<http://www.somalitalk.com/sun/25.html>
26. Q 26aad: Halkan ka daawo Barnaamijkii uu sii daayey Aljazeera (English) ee Jan 17, 2009.
<http://www.somalitalk.com/sun/rifiuti.html>

27. Q 27aad: THE EVIDENCE OF TOXIC AND RADIOACTIVE WASTES DUMPING IN SOMALIA AND ITS IMPACT ON THE ENJOYMENT OF HUMAN RIGHTS: A CASE STUDY
<http://www.somalitalk.com/sun/26.html>
28. Somalia used toxic dumping ground By. Freelance Journalist Chris Milton, 2009 Ecologist Magazine March 2009
<https://theecologist.org/2009/mar/01/somalia-used-toxic-dumping-ground>
29. Poor Somalia Toxic Waste By Abdulkadir Khalif Nairobi, Mar 28, 2005
<https://reliefweb.int/report/somalia/poor-somalia-toxic-waste-home-govt-abroad>
30. Somalia Became Land of Poison By: Haboon Haji Abdi April 02, 2014
<http://waagacusub.net/articles/298/Somalia-Became-Land-of-Poison>
31. SOMALIA: Radioactive waste surfaces in the coastline – Minister March 27, 2011
<https://ethiopianimes.wordpress.com/2011/03/27/somalia-radioactive-waste-surfaces-in-the-coastline-%E2%80%93-minister/>
32. Ma Burcad baddeed baa mise waa kaluumaysato , W/Q Maxamed Cabdi Caynab Nofeembar 05 2015
<http://mudug.net/puntland-news/ma-burcad-baddeed-baa-mise-waa-kaluumaysato%E2%80%A6-wq-maxamed-cabdi-caynab>
33. THE ITALIAN CONNECTION: HOW ROME HELPED RUIN SOMALIA
https://www.washingtonpost.com/archive/opinions/1993/01/24/the-italian-connection-how-rome-helped-ruin-somalia/cd843c56-6443-42e4-98b6-0f0a9147cee3/?utm_term=.d9601a510df5
34. Somali Pirates Resisting the Dumping of Nuclear and Toxic Waste, The Truth
<https://www.youtube.com/watch?v=fiSkpFBUG2Q>
35. The Toxic Truth (nuclear waste dumping in Somalia) - People & Power
<https://www.youtube.com/watch?v=wSr-8mBm94s>
36. Nuclear Waste Dumping at Sea "paid" - Somalia
<https://www.youtube.com/watch?v=H71kMPy-UvU>
37. Somali "Pirates" & Toxic Waste 1 of 3
<https://www.youtube.com/watch?v=5KWluNw8t44>
38. Toxic waste makes Somalis "Pirates"
<https://www.youtube.com/watch?v=5qNpID6GucE>
39. Fannaanka Keynaan oo ka hadlaya Budhcad-baddeeda iyo nuclear-ka lagu shubo Soomaaliya
<https://www.youtube.com/watch?v=RhkUL4qkfj8>

40. Ali Mahdi oo ka hadlay Sunta lagu shubay Soomaaliya (RBC: Waraysi)
<https://www.youtube.com/watch?v=hFc8h8FX8s0>
41. XOG DHAB AH:Maxaad kala socota sunta badda soomaliya lagu shubo sanad walba
<https://www.youtube.com/watch?v=xfpznurgxE>
42. Admiral Faarax Qare ayaa ka Hadlay Sunta Lagu Soo Daadiyo Xeebaha Soomaliya
<https://www.youtube.com/watch?v=in8-B9O6Dds>
43. Axmed Siilaanyo”Madaxweynihii hore ee Somaliland” oo sheegay in badaha lagu shubo sun
<https://www.youtube.com/watch?v=-v8JyThHxm8>
44. Xaashi Cumar oo wareysi lala yeeshay markii lasoo daayey halkan hoose ka daawo
<https://www.youtube.com/watch?v=EkMfVQb9HKE>
45. Barnaamij laga diyaariyey dilka weriyayaasha iyo Xadhiga Xaashi Cumar
https://www.youtube.com/watch?v=_uk1a_O6PZc
46. Xildhibaan Qamar Maxamed Saalax oo ka tirsan golaha deegaanka ee Sanaag oo ka digtey sunta bahaha lagu shubo
https://www.youtube.com/watch?v=OWeDI_KH1jl
47. Bulshada ku nool Xarsho ee gobolka Sanaag ayaa qeylodhaan ka direy sunta kusoo caaridye xeebta
<https://www.youtube.com/watch?v=j25tn3iypUA>
48. Barnaamijka kaalinta dadweynaha ee Kalsan Tv wareysi ku sahabsan sunta lagu shubey Soomaaliya 2016
<https://www.youtube.com/watch?v=GZOXi-53EW8>
49. Guddoomiyaha Ururrka HANAD ee Gobolka Banaadir Marwo Ruqiya Cali Cabdulle oo qeylodhana direy ku sahabsan sunta kusoo caariyeysa xeebaha Soomaaliya
<https://www.youtube.com/watch?v=GZOXi-53EW8>
50. Muuqaal laga soo duubey sunt ka daadatey foostooyinkii kusoo caaryey xeebaha Soomaaliya
<https://www.youtube.com/watch?v=Eu0QoMoTjU0>